XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# WARBIXINTA WAXQABADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE JFS 2024

# Tusmada

ERAYADA LA SOO GAABIYAY ........ iii
GOGOLDHIG........ iv
FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD ........ vi
GUULAHA UGU MUHIIMSAN EE HANTIDHOWRKU GAARAY........ ix

**1. HORUDHAC........ 1**

1.1. Natiijooyinka la filiyay 2024 ........ 2
1.2. Mudnaanta Istiraatiijiyadda........ 3

**2. DULMAR GUUD ........ 7**

2.1. Waajibaadka Xafiiska Hantidhowraha Guud (XHG)........ 7
2.2. Hiigsiga Istaraatiijiyadeed, Himilada iyo Qiyamka XHG........ 10
2.3. Qaab-dhismeedka Xafiiska ........ 12
2.4. Shaqaalaha ........ 14
2.5. Arrimaha Horseeda Guulaha........ 15
2.6. Qorshaha Qiimeynta Khataraha Baarista........ 19

**3. HAWLAHA BAARISTA & WARBIXINNADA 2023 & 2024... 21**

3.1. Warbixinnada Baarista Hantidhowrka ee la soo saaray 2023........ 23
3.2. Warbixinnada Baarista Hantidhowrka ee 2024 ........ 26

**4. HORUMARKA IYO NATIIJOOYINKA LAGA GAARAY YOOLASHA ISTARAATIJIYADEED........ 30**

4.1. YOOLKA 1AAD: Dhijitaaleynta hannaanka hantidhowrista iyo horumarinta habab hantidhowr oo cusub, si Xafiisku awood ugu yeesho soosaarista warbixinno ku habboon, waqtiyeysan lehna tayo sare . 31
4.2. YOOLKA 2AAD: Hirgelinta maamul wanaagsan, oo leh hoggaan iyo anshax adag, si loo xoojiyo wax-ku-oolnimada iyo waxtarka XHGS 36
4.3. YOOLKA 3AAD: Abuuridda xiriir firfircoon iyo iskaashi ku dhisan kalsooni oo lala yeesho daneeyeyaasha........ 38

4.4. **YOOLKA 4^AAD^**: Howlgelinta kaadir aqoon iyo xirfad sare leh, si loo helo hay'ad loo dhan yahay oo sameysneysa horumar joogto ah ... 42

4.5. **YOOLKA 5^AAD^**: Xoojinta dhijitaaleynta iyo adeegyada taageerada si loo xaqiijiyo Waxtarnimada XHGS ... 44

4.6. **YOOLKA 6^AAD^**: Hubinta Madax-bannaanida, helidda Khayraad ku filan iyo xaqiijinta taageerada hormarka karaanka XHGS ... 46

4.7. **YOOLKA 7^AAD^**: Adkeynta xiriirka iyo Wadashaqeynta XHG la leeyahay Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDFS ... 49

4.8. QIIMAYNTA WAXQABADKA "SAI-PMF": YOOLASHA, TUSAHA, TIXRAACA, IYO NATIIJADA ... 51

**5. HORUMARINTA ISKAASHIGA CAALAMIGA AH IYO IS-DHAAFSIGA XIRFADAHA ... 53**

5.1. Kulamada iyo hawlaha u qabsoomay XHG sanadka 2024 ... 53

5.2. Mashruuca Taageerada XHG ee hay'adaha dhiggeena ah ... 55

5.3. Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Sweden ... 56

5.4. Bangiga Adduunka ... 56

5.5. MIDOWGA YURUB (EU) ... 56

**6. QOONDADA MIISAANIYADDA ... 57**

Nidaamka Qaabdhismeedka Taageerada | 2023-2027 ... 58

# ERAYADA LA SOO GAABIYAY

| Erayga | Faahfaahinta |
|---|---|
| **AFROSAI-E** | Ururka Hay'adaha Hantidhowrista Sare ee Afrika ee ku Hadla Afka Ingiriiska |
| **DFS** | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **DXDF** | Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka |
| **EU SFA TA** | Mashruuca Taageerada Farsamada ee La-xisaabtanka Maaliyadda Soomaaliya |
| **GMM** | Guddiga Miisaaniyadda Maaliyadda |
| **INTOSAI** | Ururka Caalamiga ah ee Hay'adaha Sare ee Hantidhowrka |
| **IPSAS** | Heerarka Xisaabaadka Maaliyadda ee Hay'adaha Dawliga ah |
| **ISSAIs** | Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Guud |
| **JFS** | Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya |
| **SAI PMF** | Hannaanka Qiimeynta Waxqabadka  Hay'adaha Hantidhowrka Guud |
| **SCRP** | Mashruuca Ka-soo-kabashada Xasaradaha ee Soomaaliya |
| **SFMIS** | Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadda Soomaaliya |
| **SOMCAS** | Nidaamka Uruurinta Canshuuraha Furdooyinka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **SRCS** | Nidaamka Uruurinta Dakhliga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **XFS** | Xukuumadda Federaalka Soomaaliya |
| **XHG** | Xafiiska Hantidhowrka Guud |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS

جمهورية الصومال الفيدرالية
ديوان المراقبة العامة

Federal Republic of Somalia
Office of the Auditor General of FRS

**Han. Lam #:** XHG/HG-460/2025 **Taariikh:** 18/05/2025

**Ku: Ra'iisal Wasaaraha, XFS**
**Ku: Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka FS,**
**Ku: Madaxweynaha, JFS**
**Muqdisho, Soomaaliya**

**Warbixinta Waxqabadka Xafiiska Hantidhowrka Guud JFS ee Sanadka 2024**

**Mudanayaal,**

Waxaa sharaf iyo qaayo weyn ii ah in aan si rasmi ah idin kugu soo gudbiyo Warbixinta Waxqabadka Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS sanadka 2024, si waafaqsan Qodobka 28aad (1) ee Sharci Lr. 14, 2023, Warbixinta ayaa iftiiminaysa horumarka Xafiiska Hantidhowrka Guud uu ka sameeyay sare u qaadista daahfurnaanta, is-la-xisaabtanka, iyo hufnaanta maamulka maaliyadda guud ee dalka, Caqabadaha haysta Hantidhowrka Guud iyo sida ay uga go'an tahay dhiirigelinta maamul wanaagga iyo hubinta wax ku oolnimada isticmaalka kheyraadka Dalka.

Waxa aan ku kalsoonahay in warbixintani indin ka caawin doonto fahamka iyo qiimaynta waxqabadka Xafiiska, halka talooyinka ku jira warbixinta ay door muhiim ah ka qaadan karaan go'aan qaadashada heerka sare iyo dardargelinta dadaallada la xisaabtanka hay'adaha dowladda.

Si Waafaqsan Sharciyada kala ah Lr. 22. 2016, Lr. 17, 2019 iyo Lr. 14, 2023. XHG ee JFS waxa ka go'an in uu si wax-ku-ool ah uga qayb-qaato dadaallada dib u hagaajinta maareynta maaliyadda guud ee dalka, dhaqangelinta sharciga iyo hubinta in hay'adaha dowladdu u gutaan waajibkooda sida ugu wanaagsan uguna waxtarka badan dalka iyo dadka Soomaaliyeed.

Villa Somalia, Mogadishu, Somalia www.oag.gov.so oag@oag.gov.so

Hantidhowre Guud ahaan, waxa aan uga mahadcelinayaa Xukuumadda Federaalka, Madaxeynaha JFS iyo Baarlamaanka FS taageeradooda hagar la'aaneed ee XHG, sidoo kale waxaaan bogaadinayaa garab-istaagga farasamo iyo taageerada joogtada ah ee bahawadaagta iyo daneeyayaasha (stakeholders) taas oo horseedday Wadashaqeyn wanaagsan iyo Natiijo kaalin wanaagsan ka qaadatay horumarka XHG ee JFS.

***Guuleysta Goor & Ayaan,***

***Mudane Axmed Ciise Guutaale***
***Hantidhowraha Guud***
***Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya***

# FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD



Aniga oo gudanaya waajibka ku xusan qodobka 28aad ee Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud oo ah u gudbinta Warbixinta Waxqabadka XHG ee sanadka 2024, waxa aan si rasmi ah halkan ula wadaagayaa Labada Aqal ee Baarlamaanka FS, Madaxweynaha JFS, iyo Ra'iisul Wasaaraha XFS Warbixinta Waxqabadka Sanadlaha ah ee XHG ee 2024.

Warbixintani waxa ka kooban tahay 70 bog iyo 6 qeybood, waxa ayna si faah-faahsan u iftiiminyesaa guulaha, gaabisyada caqabadaha iyo fursadaha XHG ee sanadka 2024, sidoo kale waxa ay wax ka tareysaa qiimeynta waxqabadka XHG, taas oo ka caawinaysa daneeyeyaasha sida hay'adaha dowladda, Baarlamaanka, Bahwadaagta Horumarinta (developing partners), Saxaafadda iyo Bulshada Rayidka in ay fahmaan Waxku oolnimada kaalinta korjoogteyneed, waxqabadka iyo waxtarka Warbixinnada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee xoojinta dowlad-wanaagga, dakhliga iyo hubinta saxnaanta maalmulka maaliyadda guud.

Warbixinta Waxqabadka Sanadlaha ah ee XHG sanadka 2024, waxa ay tilmaameysaa dhinacyada XHG ka sameeyey horumarka, islamarkaana madaxda sare ee dowladda ku biirinaysaa talooyin muhiim u ah gaarista go'aannada la xariira hubinta in dakhliga dowladda loo adeegsaday si wax-ku ool ah iyo in si u adeegeysa Qaranka loo maareeyey kheyraadka dalka, taas oo xoojinaysa kalsoonida dadweynaha iyo hufnaanta hay'ada dowladda.

Sanadka 2024, XHG waxa uu gaaray Guulo muhiim ah oo ay kamid yihiin:

1. Kordhinta Baaxadda Hantidhowrista;
2. Hirgelinta Nidaamka danabeysan ee Diiwaangelinta Qandaraasyada iyo Heshiisyada dowladda (Contract Management System - CMS) si loo casriyeeyo maamulka heshiisyada la xariira Maaliyadda guud ee dowladda;
3. Hubinta iyo dabagalka talooyinka hantidhowriseed iyo kuwa la xariira ku dhaqanka Sharciga ee Xafiisku siiyey hay'adaha dowladda si waafaqsan Qodobka 9aad ee Sharci Lr. 14, 2023.

Ilyada oo la tiigsanayo ballaarinta baaxadda baaritaannada hantidhowrka sida ay qabaan Sharciyada Lr. 17, 2019 iyo Lr. 14, 2023. Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu 2024 fuliyay Baarista Waxqabadka (Performance Audit) oo lagu sameeyay laba mashruuc oo uu maalgeliyey Bankiga Adduunka, kuwaas oo kala ah Mashruuca Biyaha ee Adkeysiga iyo Wax-soo-saarka Beeraha iyo Xoola-dhaqatada-Biyoole (Water for Agro-Pastoral Productivity and Resilience) iyo Mashruuca Ka-soo-kabashada Xasaradaha Soomaaliya (Somalia Crisis Recovery Project SCRP). Xafiisku waxa uu khaladaadkii ka soo baxay baarista mashaariicdan,talooyinkii hantidhowrista iyo kuwii Sharcigaba la wadaagay Wasaaradaha Maaliyadda iyo Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, isaga oo nuqullada Warbixinta Waxqabadka ee Mashaariicdaas u diray labada aqal ee BFS, Madaxweynaha JFS iyo Ra'isalwasaaraha XFS.

Si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, XHG waxa uu sanadkan 2024 hormariyey hannaanka Baarista iyo Dabagalka Nidaamyada Tiknoolajiyadeed (IS Audit) oo lagu sameeyay nidaamyada muhiimka ah ee dowladda sida.

1. Nidaamka Uruurinta Canshuuraha Furdooyinka ee DFS (SOMCAS),
2. Nidaamka Uruurinta Dakhliga ee DFS Soomaaliya (SRCS), iyo
3. Dabagal lagu saameyay Nidaamka maareynta Xogta Maaliyadeed ee Soomaaliya (SFMIS), taas oo xoojinaysa tayaynta hubinta tiknoolajiyadeed iyo hab-raacyada sugnaanta xogta.

Sidoo kale XHG waxa uu fuliyey baarista 22 mashruuc oo uu maalgeliyey Bankiga Adduunka, waxa uuna soosaaray talooyin wax-ku-ool ah si loo hubiyo hufnaanta adeegsiga lacagta deeq-bixiyeyaasha, taas oo gacan ka geysanaysa xoojinta isla-xisaabtanka iyo maareynta maaliyadda guud.

Xafiiska Hantidhowrka Guud isaga oo ka duulaya mabda'a xoojinta xiriirka ka dhexeeya Xafiiska iyo dadweynaha waxa uu sanadkan 2024 qabtay kulamo wacyigelineed, iyo aqoon-is-weydaarsiyo lagula wadaagayay Warbaahinta, dadweynaha iyo hay'adaha dowladda faahfaahin ku saabsan hab-raacyada baarista iyo dhaqangalka Sharciga Hantidhowrka (Sharci Lr. 14, 2023).

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu si waafaqsan Qodobka 11aad ee Sharciga Lr. 17, 2019 iyo Qodobka 5aad (9) ee Sharci Lr. 14, diiwaangeliyay 856 Qandaraas/Heshiis, 6 Sharci, deeqo , deymo , damaanado iyo 166 Xeer oo ka soo baxay Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha XFS.

Waxqabadka XHG ee sanadka 2024 si waafaqsan Qodobada 11aad iyo 5aad (4) ee Sharciyada Lr. 14, 2023 iyo Lr. 17, 2019, kuna jaan-go'an yoolka 7aad ee istaraatiijiyadda 2023-2027, waxa ka-mid ah bixinta kaalmo xirfadeed iyo wada-shaqayn wanaagsan oo uu la yeeshay Xafiisyada Hantidhowrka Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya (DXDF)

Waxa aan si weyn u bogaadinayaa dadaalka iyo xirfadda hawl-wadeenadeenada xafiiska oo laf-dhabar u ahaa guulahan, waxa aan sidoo kale u mahadcelinayaa Baarlamaanka FS, Madaxweynaha JFS

iyo Xukuumadda oo si waxtar leh u taageereeyey fulinta howlgalka Xafiiska Hantidhowrka Guud.

Sidoo kale waxa aan u mahad-celinayaa Bahwadaagta horumarineed iyo daneeyeyaasha kale ee u fidiyey XHG taageero farsamo oo la xariirta horumarinta garaadka Shaqaalaha, xirfadda iyo Qalabka hantidhowrka

*"Xafiiska Hantidhowrka Guud, Waxa uu leeyahay Qorshe Istiraatiijiyadeed 2023-2027, kaas oo nagu hagaya casriyeynta Mihnadda iyo hirgelinta heerarka caalamiga ah ee hay'adaha Hantidhowrista Sare"*

***Mudane: Axmed Ciise Guutaale***
***Hantidhowraha Guud, JFS***

# GUULAHA UGU MUHIIMSAN EE HANTIDHOWRKU GAARAY

Sanadka 2024, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu qaaday 6 tallaabo oo saameyn wanaagsan ku yeeshay maareynta maaliyadda guud, daahfurnaanta, iyo isla-xisaabtanka, si waafaqsan Qorshaha Istiraatiijiyadda 2023-2027 iyo waajibaad-ka ku xusan Sharciyada Hantidhowrka Guud iyo maareynta Maaliyadda Guud, lix-daas tallaabo ee Xafiisku qaaday ayaa kala ah:

1. **Hirgelinta Sharciga Cusub:** XHG ayaa ku tallaabsaday guulo waaweyn oo ku saabsan hirgelinta Sharciga Hantidhowrka, (Sharci Lr. 14, 2023) . Waxaa la dhameystiray qorshaha kala-guurka ee hirgelinta sharciga cusub, waxaana Sharciga Xafiiska loo turjumay Luqadda Ingiriiska , iyada oo lagu daabacay Ma-reegta Xafiiska. kulamo aqoon-is-weydaarsi iyo wacyigelin ah oo ku saabsan mas'uuliyadaha ku xusan sharciga cusub ayaa loo qabtay hay'adaha dowladda. Tallaabadan ayaa muhiim u ah xoojinta isla-xisaabtanka, daahfurnaanta, iyo kormeerka maaliyadda guud, iyo sidoo kale sare u qaadidda hannaanka u-hog-gaansanaanta sharciga.

2. **Kordhinta Baaxadda Hantidhowrista:** Sanadka 2024, XHG waxa uu mar kale, sanadkii labaad oo xiriir ah, ku guuleystay in uu warbixin sanadeedka baarista maaliyadda u gudbiyo Baarlamanaka 30ka June, si waafaqsan Sharciga maar-eynta Maaliyadda Guud, sidoo kale xafiisku waxa uu ballaariyay tirada iyo noo-cyada baarista, isaga oo kordhiyay tirada hay'adaha la baaray. Sidaas awgeed, XHG ayaa markii ugu horeysay hirgeliyay baarista waxqabadka (Performance audit) islamarkaana soo saaray laba warbixin hantidhowr oo ku saabsan Wax-qabadka Mashruuca Biyaha Wax-soo-saarka, Adkeysiga Beeraha iyo Xoolo-dh-aqashada (Biyoole) () iyo Waxqabadka Mashruuca Ka-soo-kabashada Xasara-daha Soomaaliya (SCRP), kuwaas oo xoojinaya waxtarka, wax-ku-oolnimada, isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta mashaariicda ka socda dalka ee uu maal-geliyo Bankiga Adduunku (WB).

3. **Kobcinta Kartida iyo Mihnada:** Sanadka 2024, XHG ayaa si weyn u xoojiyay ko-baca mihnada shaqaalaha, waxaana in ka badan 40 shaqaale ay ka qaybgaleen tababarro kala duwan oo dalka dibadiisa ah, iyada oo 6 shaqaalaha ka mid ah ay kasbadeen shahaado-xirfadeed, sidoo kale, XHG waxa uu qaatay 25 shaqaale oo cusub si loo xoojiyo awoodda Xafiiska iyo karaanka shaqaalaha, taas oo ka dhigan koror muuqda marka loo barbardhigo Sanadkii hore.

4. **Xoojinta Xiriirka Daneeyeyaasha:** Sanadka 2024, XHG ayaa hirgeliyay hin-disayaal wacyigelin muhiim ah oo lagu xoojinayay wacyiga guud, iskaashi-ga-shaqo iyo awoodda farsamo ee Daneeyeyaasha . Waxaa ugu muhimsanaa qoon-is-weydaarsi socday labo maalmood oo lagu boorinayay hay'adaha dow-ladda in ay meesha ka saaraan caqabadaha ku horgudban fulinta talooyinka baarista. Dhanka kale, kulammo wacyigelin ah oo lala yeeshay saxaafadda ayaa

lagu xoojiyay fahamkooda warbixinnada baarista iyo baahinta xogta saxda ah. Dadaalladan waxa ay ka tarjumayaan sida ay XHG uga go'an tahay xoojinta is-la-xisaabtanka , daahfurnaanta, iyo wada-shaqeynta Daneeyeyaasha.

5. **Horumarinta Danabeysan ee XHG:** XHG waxa uu hirgeliyay hababka danabeysan ee baarista sida habka la socodka baarista, habka ogaanshaha musuqmaasuqa la xariira warqadaha lacag qabashada, iyo nidaamka diiwaangelinta heshiisyada, si kor loogu qaado daahfurnaanta, isla-xisaabtanka , iyo xiriirkaDaneeyeyaasha .

6. **Diiwaangelinta Qandaraasyada, Heshiisyada iyo Sharciyada:** Si waafaqsan Qodobka 11aad ee Sharciga Maamulka iyo maareynta Maaliyadda Guud Lr. 17, 2019 iyo Qodobka 5aad (9) ee Sharciga Lr. 14, 2023 Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu si rasmi ah u diiwaangeliyaa dhammaan qandaraasyada dowladda, heshiisyada, sharciyada, xeerarka, deeqaha dowladda, deymaha, dammaanadaha, kala-wareejinta miisaaniyadda, iyo dikreetooyinka ka soo baxa Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha XFS. Sanadkii 2024, XHG waxa uu si rasmi ah u diiwaangeliyay 856 qandaraas/heshiis iyo 6 sharci; 166 xeer ka soo baxay Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha XFS. kuwaas oo lagu hubinayo in loo kaydiyay xogta si dhammaystiran, hufan oo la isku hallayn karo, taas oo lagu dhiirrigelinayo furfurnaanta iyo kormeerka hawlaha dowladda, sidoo kalana kor u qaadaysa kalsoonida iyo fahamka dadweynaha ee ku saabsan maamulka hufan iyo waajib-gudashada dowladeed.

# 1. HORUDHAC

Warbixinta Sanadlaha ah ee Waxqabadka XHG waxa ay sawir guud ka bixineysaa horumarka iyo guulaha Xafiiska Hantidhowrka Guud ka gaaray hirgelinta qorshe-hawleedka Sanadka. Warbixinta waxqabadka sanadka 2024 waxa ay si faahfaahsan uga hadlaysaa guulaha wax-ku-ool ka ah ee laga gaaray fulinta yoolalka istiraatiijiyadeed ee ku xusan Qorshaha Istaraatiijiyadda 2023-2027, Sidoo kale, warbixintu waxa ay soo gudbinaysaa tusayaal muujinaya heerka tayada, Qiimaha iyo waxtarka shaqooyinka la qabtay.

Iyada oo la joogtaynayo horumarinta iyo isla-xisaabtanka, waxa aan bartamaha muddo howleedka sanadka dib-u-eegis ku samaynay qorshaha Istaraatiijiyadda 2023-2027, Dib-u-eegistan waxa ay diiradda saareysay qiimeynta waxqabadka xafiiska si waafaqsan halbeegga Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud (SAI Performance Measurement Framework) SAI PFM), Habkan waa hab dhameystiran oo lagu cabbiro waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud, kaas oo Ururka Caalamiga ah ee hay'adaha hantidhowrka Guud (INTOSAI – International Organization of Supreme Audit Institutions) u aqoonsanyahay in uu yahay mid kor u qaadaya daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka maareynta Maaaliyadda Guud.

Dib-u-eegista muddada dhexe ee muddo howleedka sanadka waa hab muhim ah oo lagu hubsanayo sida ugu habboon ee aan ku gaari karno yoolalka Istaraatiijiga ah ee ku xusan qorshaha XHG si waafaqsan tabaha ugu wanaagsan ee caalamiga ah.

Ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay qiimeyntaan waa in si isu-dheelitiran loo qiimeeyo waxqabadkeena anaga oo adeegsanayna tusayaasha habka SAI PMF, kuwaas oo daboolaya dhinacyo kala duwan sida tayada baarista, maamul-wanaagga, iyo wadashaqeyntaDaneeyeyaasha , Dib-u-eegista muddada dhexe ee mudda howleedka ma aha keliya hab lagu qiimeeyo sida ugu habboon ee aan ku gaarayno yoolasha istaraatiijiga ah ee ku xusan qorshaheena balse sidoo kale waxa ay u gogol-xaarayaan dib-u-eegista qorsheysan ee bartamaha sanadka 2025, iyada oo la xaqiijinayo in aan ku shaqeyno tabaha ugu wanaagsan ee caalamiga ah.

**Qiimeyntaani waxa ay naga caawinaysaa:**

- **Garashada Meelaha uu Waxqabadku ka liito:** Annaga oo fiirinayna heerka aan marayno marka loo eego halbeegyada noo dagsan, waxa aan si sax ah u aqoonsan karnaa meelaha u baahan in horumar laga sameeyo.
- **Xoojinta Jaangooynta Istaraatiijiyadda:** Dib-u-eegistu waxa ay naga caawisaa in aan hubinno in hawlaha socda ay si buuxdo ugu jaango'an yihiin istiraatiijiyadda xafiiska iyo filashada Daneeyeyaasha.
- **Sare u Qaadidda Isla-xisaabtanka iyo Daahfurnaanta:** Markaan si furan u baahinayno natiijooyinka dib-u-eegistan, waxaan hiigsanaynaa in aan kor u qaadno isla-xisaabtanka nooga aadan muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo Daneeyeyaasha kale.

- **Hagaajinta Qorshayaasha Mustaqbalka:** Natiijooyinka kasoo baxa dib-u-eegistan waxa ay wax ka tarayaan qorshaynta istiraatiijiyadda iyo agaasinka khayraadka baarista inta ka hartay muddada hirgelinta.
- **Qiimeyn Dhameystiran:** lafa-gurid faahfaahsan oo ku saabsan heerka tilmaamayaasha Hannaanka Cabbir Ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud (SAI PMF), iyo in aan garanno meelaha ugu muhiimsan ee waxqabadku ka liito iyo caqabadaha jira.
- **Talooyin la fulin karo:** Soo saaridda talooyin bartilmaameed leh oo lagu xalliyo khaladaadka jira, loona hagaajiyo waxtarka howleed ee XHG.
- **Xiriirka wada-shaqaynta Daneeyeyaasha:** Xoojinta xiriirka iyo tala-gelinta Daneeyeyaasha si loo helo aragtiyadooda, laguna daro talooyinkooda hindisayaasha istiraatiijiga ah.
- **Hagaajinta warbixinnada:** Harumarinta hannaanka diyaarinta warbixinnada si- Daneeyeyaasha u helaan xogta waxqabadkeena iyo hawlaha socodo.

Iyada oo la raacayo qorsha howleedka la ansixiyay ee sanadkii dhamaaday, warbixintaan waxa ay soo bandhigeysaa xog faahfaahsan oo ku saabsan waxqabadkeenna maaliyadeed, horumarka howlaheenna iyo natiijooyinka la gaaray. Warbixinta hawlaha qabsoomay waxaan uga gol-leenahay in la kobciyo maamul-wanaagga, isla-xisaabtanka, iyo daahfurnaanta, iyada oo la raacayo Mabaa'di'da Daahfurnaanta iyo Isla-xisaabtanka (INTOSAI-P-20) iyo Qiyamka iyo Waxtarka Hay'adda Sare ee Hantidhowrista (INTOSAI-P-12).

## 1.1. Natiijooyinka la filiyay 2024

Marka la eego dadaallada XHG sameeyay, waxa ay saameyn wanaagsan ku leeyihiin horumarinta waxqabadka, isla-xisaabtanka, iyo nidaamka maareynta Maaliyadda guud ee hay'adaha dowladda. Natiijooyinka lagu taamayay sanadka 2024 waxaa ka mid ahaa:

- In Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya loo aqoonsado tusaale ku dayasho mudan oo dhanka maamul wanaagga ah.
- In Barlamaanka JFS uu door firfircooni lehka qaato dabagalka hirgelinta talooyinka ku xusan warbixinada baarista.
- In la xoojiyo hirgelinta talooyinka uu soo jeediyo XHG ee ku aaddan waxqabadka maaliyadeed iyo maamul ee hay'adaha kala duwan ee dowladda.
- In Xafiisyada Hantidhowr ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah DFS ay sameeyaan baaritaanno tayo sare leh si waafaqsan hab-raacyada sharciyadda dalka iyo hab-raacyada caalmiga ah.

Horumarka laga gaaray natiijooyinka ayaa ahaa mid la taaban karo sanadkii 2aad ee hirgelinta Qorshaha Istaraatiijiga ah ee ku asteysan 2023-2027. XHG waxa uu sii xoojinayaa inuu noqdo tusaale wanaagsan oo dhanka Maamul wanaagga ah, si loo horumariyo isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta, iyada oo la adeegsanayo maarayn

hufan, ku-dhaqanka xeerarka anshaxa, baaritaan gudaha hay'adda ah, iyo gudbinta adeeg tayo sare leh.

Waxaa aan xoojinnay istiraatiijiyadda iskaashiga aan la leenahay Guddiga Miisaaniyadda Maaliyadda, Qorsheynta, Iskaashiga iyo La-xisaabtanka Hay'adaha Dowladda ee Baarlamaanka JFS, taas oo awood u siineysa inay si adag ula socdaan talooyinka ka soo baxa warbixinada hantidhowrka ayna qaadaan tallaabooyin ku habboon oo ku saleysan warbixinada xafiiska. Inkasta oo aan la soconno hirgelinta talooyinka hantidhowrka, isla markaana aan ku muujinno warbixinta Sanadlaha ah, waxa aan garowsannahay in loo baahan yahay in la kordhiyo wadashaqeynta laanta fulinta ee howshaan. Sidaas awgeed, waxa aan si firfircoon uga shaqeyneynaa in aan wanaajino dhinacan annaga oo joogteynayna wada-hadalka aan la leenahay laanta fulinta, labada aqal ee Baarlamaanka JFS, iyo Shacabka.

Si loo xaqiijiyo hufnaanta shaqo ee Xafiisyada Hantidhowrka Dowlad-goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDF), waxa aan iskaashi la leenahay saaxiibada iyo bah-wadaagta horumarinta, annaga oo siinayna taageero dhinaca kobcinta karaanka ah si loo horumariyo hawlaha-shaqo ee horyaalla. Iskaashigan waxaa looga gol-leeyahay in looga gudbo dib u dhaca ku yimaado warbixinnada baarista isla markaana si weyn looga faa'iideysto natiijooyinka wax ku oolka ah ee ka soo baxa hawlaha baarista.

## 1.2. Mudnaanta Istiraatiijiyadda

Mudnaanta kowaad ee Istiraatiijiyadda XHG waxa ay diiradda saareysaa kobcinta isla-xisaabtanka, daahfurnaanta, anshaxa, iyo hufnaanta adeegyada guud, iyada oo loo marayo baaritaan tayo sare leh. Waxaan u heellanahay in aan saameyn wanaagsan ku yeelanno nolosha Muwaadiniinta anaga oo xoojinayna isla-xisaabtanka iyo tayaynta adeegyada hay'adaha dowladdu siiyaan bulshada.

Marka aan baareyno kharashaadka dowladda, waxaan helnaa xogo toos ah oo ku saabsan hawlgallada iyo isbeddellada ka dhacaya gudaha Hay'adaha Dowladda. Wada-shaqaynta Sanadlaha ah ee aan la leenahay Hay'adaha Dowladda iyo dowrkeena soosaaridda warbixinno madaxbannaan sida uu qabo Sharciga Hantidhowrka,  xafiiska waxa uu il-xogeed lagu kalsoonyahay u yahay dowladda, labada aqal ee Baarlamaanka , iyo bulshada. Marka loo kuur-galo warbixinta baaritaannada aan samayneyno, waxaan dowr weyn ka qaadannaa xoojinta Hay'adaha Dowladda, anaga oo kaashanayna awoodda aan u leenahay in aan soo saarno warbixinno, kana qeybgalno doodaha la xiriira maamulwanaagga, isla-xisaabtanka, adkaysiga Maaliyadeed, iyo isticmaalka hufan ee kheyraadka dalka.

### 1.2.1. Iskaashi iyo Xiriir Joogto ah

Si aan uga dhabeyno muhimadda xiriirka iyo iskaashiga joogtada ah ee aan la leenahay  Baarlamaanka iyo Daneeyeyaasha  kale-ba, waxa naga go'an in aan soo dhaweynno aragtida naga-baxsan, Waxa aan mudnaan gaar ah siinaynaa in aan helno talo-celinta nooga imaanaysa Daneeyeyaasha  ay kamid yihiin muwadiniinta hela adeegyada Hay'adaha Dowladda iyo in aan diiradda saarno dhinacyada muhiimada u leh.

Dhisidda xiriir adag oo joogto ah oo aan la yeelano dhammaan Daneeyeyaasha ay ku jiraan Baarlamaanka, Hay'adaha Dowladda, ururrada xirfadlayaasha, iyo bulshada Soomaaliyeed — waa mid lagama maarmaan ah, sidaas awgeed waxa aan ku dadaalaynaa in aan ka-fal-celino caqabadaha bulshada isla markaana aan gaarno filasha Daneeyeyaasha iyo sidoo kale in aan xal u helno khataraha ka dhex jiri kara hay'addaha dowladda iyo isbeddellada kusoo kordha bey'adeena shaqada.

## 1.2.2. Hirgelinta hoggaamin ku Dayasho Mudan

Waxa naga go'an in aan hirgelino hoggaamin leh karti iyo waxqabad mudan qof ahaan iyo Hay'ad ahaanba. Marka ay jiraan isbeddello degdeg ah, in la joogteeyo xaaladda taagan maaha wax la qaadan karo. Sidaas darteed waxaan garowsannahay in isbeddellada caalamiga ah, oo ay ku jiraan horumarka Tiknolojiyadda, ay isbeddel ku sameyn karaan filashada warbixinta baarista iyo sugnaanta xogta, ayna tahay in aan la qabsanno isbeddeladan si aan ugu sii adkeenno kaalinta hay'ad tusaale wanaagsan u ah nidaamka daahfurnaanta.

## 1.2.3. Horumarinta Joogtada ah iyo Tayeynta Shaqaalaha

Xoojinta horumarka joogtada ah ee shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waa mid ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan. Waxa ayna sidaas noogu suurageli kartaa in aan adeegsanno tababarro xirfadeed oo gooni ah, carbin shaqo, hagid iyo abaalmarin dhiirrigelineed oo ku habboon gudaha xeyndaabka shaqada rayidka ah. Shaqaale xirfad leh oo dhiirran ayaa muhiim u ah fulinta waajibaadkeenna iyo ka jawaabidda caqabadaha kala duwan ee na soo food saara.

Si loo raaco halbeegyada xirfadda-shaqo, shaqaalaheena waa in ay si joogto ah u kobciyaan xirfadahooda, aqoontooda, iyo karaankooda. Waxaana xoogga saareynaa sare-u-qaadidda xirfadaha shaqo, abuuridda fursado horumarinta shaqo, iyo kordhinta tirada shaqaalaha, annaga oo siinayna tababarro si aan u dhisno koox aqoonyahanno ah oo aad ugu xeel dheer hawlaha baarista hantidhowrka.

Xafiiska waxaa ka go'an in uu si joogta ah u wanaajiyo hababka iyo hab-raacyada baarista si uu wax uga qabto baahiyaha isbedbedalaya ee maareynta maaliyadda guud ee Soomaaliya. Ujeeddada ku jirta "Horumarinta xirfadda iyo dhaqan-gelinta hab-raacyada-haboon" waa in la xoojiyo tayada iyo waxtarka XHG.

## 1.2.4. Ka Dhabeynta Daahfurnaanta

Dadaallada joogtada ah ee lagu horumarinayo daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka maareynta maaliyadda guud ee dalka waa mid aan kala go' lahayn, Baaritaannada aan sameyno waxa ay ku ku saabsan yihiin u kuurgelidda, soo bandhigidda iyo xal u helidda khaladaadka maaliyadeed iyo bixinta talooyin wax-ku-ool ah oo lagu saxayo innaga oo xil iska saarayna qiime-ku daridda hufnaanta shaqada iyo la xisaabtanka Hay'adaha Dowladda, waxa aan ka qeyb qaadaneynaa dhisidda kalsoonida Muwaadinka iyo kor u qaadista dhaqanka maamul wanaagga.

## 1.2.5. La wadaagidda Baarlamaanka Warbixinada Hantidhowrka

Waxa aan Baarlamaanka Federaalka siinnaa warbixinta Hantidhowrka oo waafi ah, la isku halleyn karo, tayo sare leh, xiriir toos ahna la leh isticmaalka kheyraadka umadda iyo isla-xisaabtanka. Warbixinadda madaxabannaan ee aan soo saarno waxa ay u sahlayaan Baarlamaanka in uu si toos ah u kormeero waxqabadka Hay'adaha Dowladda.

Hawlaha shaqo ee baarista waxa aan xoogga ku saarnaa meelaha khatarta sare leh, iyada oo la raacayo qiimaynta khataraha, Intaas waxaa dheer in XHG talooyin siiyaa Wasaaradaha, Waaxyaha, iyo Wakaaladaha dowladda,warbixinta baarista waxa ay door muhiim ka qaadataa kobcinta nidaamka dowlad wanaagga iyo xakameynta bey'ada shaqada, taas oo sare u qaadaysa adeegsiga hantida guud si mas'uuliyad leh.

## 1.2.6. Isla-Xisaabtan Guud oo lagu Xoojinayo Waxqabadka Hay'adaha Dowladda

Warbixinnada kasoo baxa baaritaanada aan sameynno iyo talooyin ku xusan ee dhaxal-gal ka ah, ayaa saameyn toganna ku leh, sare na u qaadaya dowlad wanaagga, waxa ayna xoojinayaan waxqabadka hay'adaha dowladda. Xafiiska Hantidhowrka Guud waxaa uu baarlamaanka JFS siiyaa fikrad madaxbannaan oo ku saabsan hufnaanta warbixinnada maaliyadeed ee sanadlaha ah ee loo soo gudbiyo si loo baaro. Fikradan waxa ay muhiim u tahay u kuur-gelidda isla-xisaabtanka maaliyadeed iyo in ay muwaadiniinta awood u yeeshaan in ay gaaraan go'aanno ku dhisan xog-ogaalnimo.

## 1.2.7. Kaabidda Yoolalka Horumarka Waara

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu dowr muhiim ah ka qaatay diyaarinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee 2025-2029. Istaraatiijiyadda hagi doonta dadaallada horumarineed ee heerka qaran oo shanta sano ee soo socota la tiigsanayo. Hantidhowraha Guud waxa uu xoojinayaa, bartilmaameedna u ah kor u qaadista hufnaanta, daahfurnaanta, iyo isla- xisaabtanka Hay'adaha dowlada iyada oo diiradda la saarayo labo kamid ah shanta tiir ee qorshahu ka kooban yahay ee kala ah Isbeddal Maamul (transformational governance), iyo Isbeddel Dhaqaale-waara (sustainable economic transformation).

Xafiiska Hanti-dhowrka Guud oo ay weheliyaan hay'adaha kale ee ku fooggan daah-furnaanta, waxa ay u heellan yihiin kor u qaadida kalsoonida dadweynaha iyo horumarinta dhaqanka dowlad wanaagga, XHG waxa uu hoosta ka xarriiqaya sida ay uga go'an tahay kobcinta hay'ado dowladeed, oo hufnaan, isla-xisaabtan iyo daahfurnaan leh,, kuwaas oo aas-aas u ah dhisidda nidaam maamul oo hufan, iyada oo diiradda la saarayo tiirarka Qorshaha Isbadalka Qaranka.

**Tiirka Isbeddel Maamul**

- Tiir-hoosaadka (IV): Dib-u-habeynta Hay'adaha dowladda
- Yoolka Guud: In la dhiso hay'ado dowladeed oo leh karti, u furan muwaadiniinta,

leh joogteyn, daahfuranaan islamarkaana adeeg wax-ku-ool ah siiya dadweynaha.

- Mudnaanta: Hufnaanta Hay'adaha iyo Isla-xisaabtanka.
- Ujeeddada Istaraatiijiyadda: In la xoojiyo daahfurnaanta iyo sla-xisaabtanka Hay'adaha dowladda si loo hagaajiyo bixinta adeegyada, horumarna looga sameeyo la-dagaalanka musuqmaasuqa, korna loo qaado Tusaha Qiyaasta Musuqmaasuqa - laga soo bilaabo 11 ee 2023 ilaa 25 marka la gaaro 2029.

**Hindisaha:**

- In la helo, lana adkeeyo madax-bannaanida hay'adaha ka shaqeeya daahfurnaanta.
- Xoojinta Dowladnimada oo muwaadiniinta ay u yihiin udub dhexaad iyada oo loo marayo hufnaan iyo isla- xisaabtan.
- Xoojinta awoodda daah-furnaan ee hay'adaha iyo dhiirrigelinta xirfadda

**Tiirka Isbeddel Dhaqaale Waara**

- Tiir-hoosaadka: Horumarinta maareynta Maaliyadda Dowladda

**Hindisayaal la xiriira Xafiiska Hantidhowrka Guud:**

- Isbeddelka Danabeynta ee XHG
- Hagaajinta baaraha gudaha ee Hay'adaha Dowladda
- Horumarinta iyo Tababarka Hoggaanka

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu si qoto-dheer uga qeyb qaatay a, dib-u-habeynta iyo horumarinta lagu sameeyo hay'adaha dowlada iyo hirgelinta hababka maareynta maaliyadeed oo qeyb ka ah Qorshaha guud ee Isbeddelka Qaranka. Hindisahani waxa uu xaqiijinayaa in hawlaha dowladda lagu qotomiyo isla-xisaabtan, daahfurnaan, iyo hufnaanta adeegyada guud. Dadaaldaa ugu muhiimsan oo ay ka midyihiin casriyeynta hababka baarista, lalana jaanqaadayo isbedalka danabeysan, Awoodsiinta baaraha gudaha ee hay'adaha dowladda, iyo in la helo tababarro hoggaamineed oo heer sare ah . Waxaa sidoo kale hortabin leh, in si wax ku ool leh loo isticmaalo kheyraadka qaranka iyadoo laga faaideysanayo kartida iyo sh xirfadda Shaqaalaha si loo gaaro horumar waara XHG waxa uu qorsheeyay in hawlaha baarista sanadka 2024 lagu soo daro baaris loo fiirinayo yoolalka horumarka waara, si loo qiimeeyo horumarka dhinacyada muhiimka ah sida caafimaadka, iyo caddaaladda. Xafiiska Hantidhowrka Guud wuxuu muujiyay ka go'naasho dhab ah lagu xoojinaayo dowlad wanaagga Soomaaliya sida uu qabo Sharciga Hantidhowrka, Sharci Lr. 14. ee 2023. Iyo Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud, Sharci Lr. 17 ee 2019. Tallaabooyinkan ayaa kor u qaadaya kobaca dhaqaale, shaqo abuur, hufnaanta iyo waxtarka adeegyada guud ee Hay'addaha dowladda.

### 1.2.8. Muujinta Qiyamka Xafiiska

Waxa aan dhiseynaa dhaqan xafiis oo ka tarjumaya qiyamka xirfadeed ee Xafiis Hantidhowr Guud oo casri ah. Xafiiska oo dhiirrigelinayo xirfadaha, aqoonta, iyo tiknoloojiyada casriga ah, waxa uu awood u siineynaa shaqaalaha in ay qaataan dhaqanka horumarka joogtada ah ee xirfadda ku dhisan, si loo xaqiijiyo in waqtiga ku habboon lasoo saari karo warbixinta baarista Hantidhowrka.

Warbixintan waxa ay muujineysaa sida ay nooga go'an tahay isla-xisaabtanka, daahfurnaanta, iyo horumarinta joogtada ah iyada oo aan u taaganahay in aan sare u qaadno waxqabadka Hay'adaha Dowladda Soomaaliya, isla-markaana si waxtar leh u fulinno waajibaadka na saaran Sanadka 2024 iyo wixii ka dambeeya.

# 2. DULMAR GUUD

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hay'adda ugu sarreysa dalka ee hantidhowrista madaxa-bannaan, waxa ay sida waajibka ku ah bixisaa dadaallo lagu horumarinayo daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo maareynta suuban ee isticmaalka hantida guud. Iyada oo la raacayo xeerarka dalka iyo hababka caalamiga ah ee hantidhowrista.

XHG waxa uu ku dhisan yahay qiyam iyo aragtiyo istaraatiiji ah oo ku saleysan isla-xisaabtan iyo maamul wanaag, taas oo dhiirrigelinaysa daahfurnaanta mas'uuliyadeed ee Hay'adaha Dowladdaoo saameyn togan ku leh horumarinta dhaqan-dhaqaale ee bulshada Soomaaliyeed, sarena loogu qaado kalsoonida ay ku qabaan hay'adaha dowladda.

## 2.1. Waajibaadka Xafiiska Hantidhowraha Guud (XHG)

Xafiiska Hantidhowraha Guud (XHG) waxaa markii ugu horeysay lagu dhisay Qodobka 90aad ee Dastuurkii Soomaaliya 1960, iyada oo awooddiisa lagu faahfaahiyay Sharcigii Maaliyadda Guud (Sharci Lr. 2, 1961), iyo xeernidaamiyihiisii (Sharci Lr. 317, 1962). Si loo xoojiyo isla-xisaabtanka iyo hufnaanta hay'adaha dowladda, XHG waxa uu yeeshay sharci gaar ah (Sharci Lr. 34, oo la ansixiyay 14 April, 1972). Burburkii kadib, XHG waxaa dib loo howl-galiyay sanadkii 2012, laguna caddeeyey Qodobka 114aad ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Ugu danbeyn, XHG waxa uu noqday Hay'adda ugu sareysa Hantidhowrka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saaray awoodihiisa oo faahfaahsan (Sharci Lr. 14 ee la ansixiyay 10-kii September, 2023).

### 2.1.1. Mas'uuliyadaha iyo Awoodaha XHG

Sharciga cusub waxa uu XHG saaray waajibaad iyo mas'uuliyado dhameystiran oo la xiriira kor-joogteynta, hantidhowrista iyo ka warbixinta miisaaniyadda dowladda, u-hoggaansanaanta sharciga, waxtarka iyo hufnaanta hay'adaha dowladda, si loo xaqiijiyo in hantida dadweynaha loo adeegsado si waafaqsan sharciga iyo anshaxa maaliyadeed ee dowliga ah. XHG waxa uu si gaar ah u leeyahay waajibaadka kala ah:

1. Baarista Maaliyadeed – XHG waxa uu dib-u-eegis ku sameeyaa xisaabaadka iyo warbixinnada maaliyadeed ee hay'adaha dowladda, kadib marka uu u soo gudbiyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda, si loo hubiyo saxnaanta iyo waafaqsanaanta sharciyada maaliyadeed.
2. Baarista U-hogaansanaanta Sharciga – XHG waxa uu baaris hantidhowr ku sameeyaa in hay'adaha dowladda ay u-hoggaansamaan xeerarka iyo shuruucda maaliyadeed ee dalka iyo kuwa kale ee ay lagama maarmaanka tahay dhaqangelintoodu.
3. Baarista Waxqabadka – XHG waxa uu qiimeeyaa sida kheyraadka dowladda loo isticmaalay iyo in ay ku filnaayeen wax-soo-saarka iyo waxtarka la filayo, isaga oo odoros cad ka bixiya hannaanka wax-qabadka hay'adaha dowladda.
4. Baarista Gaarka ah – XHG waxa uu fuliyaa baaritaanno gaar ah oo lagu sameeyo hay'adaha dowladda, si loo xaqiijiyo isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta, gaar ahaan habdhaqanka baarista Sanadlaha meelaha aan si waafi ah loogu muujin khataro gaar ah ama kuwo soo jireen ah (specific or inherent risks) iyo marka ay soo baxaan hawlo u baahan baaris hantidhowr oo degdeg ah.
5. Baarista Fatashka (Forensic Audit) – Xafiisku waxa uu sameeyaa Baaris Fatash oo la xiriirta marka ay soo baxaan tuhunno musuq-maasuq, xatooyo xoolo dadweyne, khiyaano ama maamul xumo ka dhacday hay'adaha dowladda dhexdooda.
6. Baarista Nidaamyada Tiknoolajiyadda (IS Audit) – XHG waxa uu baaris ku sameeyaa oo hubiyaa nidaamyada tiknoolajiyadda ee loo adeegsado maareynta maaliyadda dowladda, si loo xaqiijiyo ammaanka xogta iyo hufnaanta maamulka nidaamyadaas.
7. Baarista Mashaariicda – XHG waxa uu baaris hantidhowr iyo qiimeyn ku sameeyaa mashaariicda dowladda ee ay bixiyaan deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah, si loo hubiyo in ay ku socdaan si waafaqsan heshiisyada la galay, qorshayaasha la dejiyay iyo shuruucda khuseysa ee dalka.

### 2.1.2. Xiriirka XHG iyo Hay'adaha Dowladda

Si loo xoojiyo isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta, sharciyada dalku waxa ay XHG farayaan in warbixinnada hantidhowrka uu u gudbiyo Madaxweynaha JFS, Ra'iisul Wasaaraha XFS iyo Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Warbixinnadan waxa ay suurto-gelinayaan in hay'adaha dowladda ay helaan xog sax ah oo ay uga go'aan gaari karaan maareynta iyo maamulka maaliyadeed ee dalka, iyaga oo warbixinnadaas ka helaya khaladaadka lagu ogaaday baaritaannadii la sameeyey iyo talooyinka uu XHG soo jeediyey.

Haddii baaritaannada XHG ay muujiyaan wax caddeyn ah oo tilmaamaysa tuhun fal-dambiyeed dhacay, XHG waxa uu awood u leeyahay in uu natiijooyinka baarista u gudbiyo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, si looga qaado tallaabo sharciga waafaqsan. Tani waxa ay xoojinaysaa isla-xisaabtanka iyo la dagaallanka mu-

suq-maasuqa ama dembiyada kale ee ka dhex dhaca hay'adaha dowladda.

### 2.1.3. Saamaynta XHG ee Maamulka Maaliyadeed

Marka Xafiiska Hantidhowraha Guud si buuxda uu u guto waajibaadkiisa waxaa:

- la horumarinayaa isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta hay'adaha dowladda.
- la xoojinayaa kalsoonida shacabka ee nidaamka dowliga ah.
- kor loo qaadaya daahfurnaanta maamulka maaliyadeed ee dowladda.
- la xaqiijinayaa in kheyraadka Qaranka loo adeegsado si waxtar leh oo cadaalad ah, laguna kalsoonaan karo.

XHG waxa uu kaalin mug leh ka qaataa hannaanka dowlad wanaagga, hufnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka dowladda, taas oo wax weyn ka taraysa horumarka waara ee Soomaaliya.

## 2.2. Hiigsiga Istaraatiijiyadeed, Himilada iyo Qiyamka XHG

### 2.2.1. Hiigsiga

Hiigsiga XHG waa: ***"In uu noqdo xafiis hantidhowr oo lagu kalsoonaan karo, madax-bannaan, kaas oo wax-ku-ool ah, qayb-na ka qaata sare-u-qaadidda daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka ku aaddan adeegsiga hantida dowladda".***

Hiigsigeenna kama-dambaysta ah waa inaan noqonno hay'ad u heellan kor-u-qaadidda isla-xisaabtanka, daahfurnaanta iyo huf-naanta guud. Waxaanu samaynnaa horumar joogto ah annaga oo hiigsanayna in noqono hay'ad la isku hallayn karo marka la joogo maamul-wanaagga. Hiigsigeennu keliya maaha inaan daba-galno hay'adaha dowladda, balse waxa si adag nooga go'an inaan noqon-no xafiis ku dadaala isla-xisaabkanka gudihiisa, iyo inaan si joogto ah u ilaalinno daahfurnaanta, hufnaanta iyo waxtarka hawl-qa-badyadeenna.

### 2.2.2. Himilada

Himaladeennu waa: ***"Inuu diyaariyo, soona saaro warbixinno han-tidhowr oo tayo sare leh oo loo gudbiyo Baarlamaanka iyo Madax-weynaha, si kor loogu qaado daahfurnaanta iyo la-xisaabtanka Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo la ilaalinayo danta muwaadiniinta Soomaaliyeed"***.

Himiladeennu waxa ay qeexaysaa ujeeddadeenna hay'ad ahaan, cidda aan u adeegno, iyo sida aan uga qeyb-qaadanayno xaqiijinta yoolkeenna weyn. Annaga oo adeegsanayna talooyinka iyo warbix-innada hantidhowrka, waxa aan si firfircoon uga qeyb-qaadanay-naa ka faa'iidaysiga waxtarka leh ee kheyraadka si loo horumariyo adeeg-siinta dadkeenna.

Tani waxa ay si dhow noogu xiraysaa dhammaan hay'adaha kale ee dowliga ah ee dalka, annaga oo ka wada shaqaynayna sidii kor loogu qaadi lahaa nolosha dadka. Dadaalkeennu waxa uu diiradda saarayaa kobcinta daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo kalsoonida lagu qabo isticmaalka hantida dowladda, sare-u-qaadidda wax-qabadka hay'adaha dowladda, dhisidda kalsoonida shacabka, iyo xaqiijinta in si hufan loo qoondeeyo kheyraadka si ay uga faa'iiday-staan muwaadiniinta Soomaaliyeed. Himiladeenna waxaa qeyb ka ah soo-saaridda warbixinno baaris oo si fudud loo fahmi karo kuwaas oo muujinaya hab-dhaqanka hay'adaha la baaray iyo in la bixiyo talooyin, marka la fuliyo, si weyn u saamaynaya waxqabadka dowladda.

### 2.2.3. Qiyamka

Qiyamkeenna asaasiga ah waxay si joogto ah u hagaan xiriirka dhexdeenna iyo kan Daneeyayaasha (Stakeholders)dibadda. Qiyamkani waxay aasaas u yihiin dhaqanka xafiiskeenna, waxayna saamayn weyn ku leeyihiin shakhsiyaadka iyo guud ahaan waxqabadka xafiiskeenna. XHG wuxuu taageeraa mihnadnimada, hal-abuurka, iskaashiga, iyo samaynta isbeddel isagoo u hoggaansamaya heerarka Hantidhowrista Caalamiga ah, u hoggaansanaanta shuruudaha sharcigu jideeyay, ilaalinta heerka ugu sarreeya ee daacadnimada, iyo inaan qaadanno masuuliyadda go'aamadeenna. Xafiiskeennu waa mid ku astaysan la-qabsi, firfircooni, isla markaana aqoonsan xirfad-wanaagga. Waxaan mudnaanta siinnaa wanaagga shaqaalaha, annagoo u wada shaqayna si hufan, xiriir caafimaad lehna la yeelana Daneeyayaasha ( Stakeholders)kala duwan. Waxaan sidoo kale mudnaanta siinnaa Danta guud, dhaxalka qaranka iyo raadka dambe ee jiilalka mustaqbalka. Qiyamkeenna asaasiga ahi waxa ka mid ah:

### Hab-dhaqan Mihnadeed

- Waxa aan u hoggaansannahay Heerarka Hantidhowrista sare ee Caalamiga ah (ISSAIs), annaga oo waafajineyna shuruudaha gaarka ah ee xeyn-daabka sharciga dalku jideeyay.
- Waxa aan mudnaanta siinaa dhowrista wakhtiga, annaga oo si joogto ah u ilaalina, in aan jawaab-celin degdega ah samaynno.
- Waxa aan ilaalinaa heerarka ugu sarreeya ee daacadnimada, sirta, iyo tayada dhammaan dhinacyada shaqadeenna.
- Isla-xiisaabtanku waa tiir-dhexaadka hab-dhaqankeenna,oo ay ka mid tahay shaqadeenna, go'aannadeenna, iyo horumarinta xirfadeenna.
- Waxa aan shaqaalaheenna u hogaaminnaa si hufnaan oo caddaalad ku dheehan tahay.

### Hal-abuur

- Waxa aan mudnaanta siinaa daahfurnaanta oo ah mabaadi'da aasaasiga ah ee shaqadeenna.
- Waxa aan u shaqaynaa si wadajir ah si aan u gaarno yoolasha la wadaago, annaga oo ka faa'iidaysanayna dadaalka wadajirka ah ee kooxdeenna (our team).
- Annaga oo dhiirrigelinayna deegaan ku salaysan ixtiraam laba-geesood ah, waxa aan kor u qaadnaa awooddeenna si aan u gaarno natiijooyin miro dhal ah.
- Waxa aanu dhidibbada u taagnaa oo aanu xoojinnaa xiriirka xirfadeed ee Daneeyeyaasha (Stakeholders) gudaha iyo dibedda labadaba.

### Iskaashi

- Waxa aan si joogto ah u raadinnaa in aan hawlaheenna oo dhan u fulinno sida ugu wanaagsan.
- Waxa aan si firfircoon u oddorosnaa, ugana jawaabnaa isbeddellada deegaanka nagu xeeran.
- La-qabsiga iyo kartida ayaa udub-dhexaad u ah shaqadeenna, taas oo noo oggolaanaysa in aan si wax-ku-ool ah uga gudubno xaaladaha kala duwan.
- Rabitaanka joogtada ah ee dib-u-cusboonaysiinta ayaa hagta u heellanaanta hal-abuurka.
- Waxa aan diyaar u nahay in aan soo dhaweyno kana mahadcelino dadaal iyo hal-abuur kasta oo wanaagsan.


### Isbeddel horseedid

- Waxa aan mudnaanta siinaa ka qeyb-qaadashada horumarinta dalkeenna iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, annaga oo diiradda saarayna abuuridda isbeddel wanaagsan.
- Ficilkeenna waxaa haga go'aan dhab ah oo ku aaddan raad dhaxal gal u ah jiilasha mustaqbalka.
- Waxa aan si wax-ku-ool ah ugu hoggaansannaa aragti bulsho oo dhameystiran annaga oo u heellan mas'uuliyadda bulshada naga saaran, iyo horumarinta joogtada ah ee hindisayaasheenna.

## 2.3. Qaab-dhismeedka Xafiiska


Qaab-dhismeedka XHG oo ah mid ku qotama sharciga cusub ee Xafiiska Hantidhowrka Qodobbada 15aad iyo 20 aad (9) ee (Sharci Lr. 14), oo la ansixiyay 10 September, 2023, waa mid qeexaya heerka awoodda, mas'uuliyadda, iyo isku-xirnaanta si loo xoojiyo hufnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka gudaha xafiiska, loona hubiyo in hawlaha baarista loo fuliyay si wax-ku-ool ah si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare. Qaab-dhismeedka hoose waxa uu ka tarjumayaa aragtida istiraatiijiga ah ee XHG oo ah in uu gaaro natiijooyin waxtar u leh oo si togan uga qeyb qaata fulinta hufan ee hawlaha ballaaran ee hay'adda:


# Qaab-dhismeedka XHGS | 2024



## 2.4. Shaqaalaha


Jaantuska hoose waxa uu ka kooban yahay shax iyo jaantusyo muujinaya tirada xubnaha shaqaalaha XHG ee 2023 iyo sidoo kale heerka ay hadda joogaan.









## 2.5. Arrimaha Horseeda Guulaha

Si loo dargargeliyo  xaqiijinta hirgelinta qorshaha istiraatijiyadeed ee 2023-2027. XHG waxa uu diiradda saaraa  dhowr arrimood oo muhiim ah, sida hoos ku qeexan:

### 2.5.1. Ku dhaqanka Qiyamka, Hiigsiga, Himilada iyo Waajibaadka

XHG waxaa dhaqaajiya qiyamka asaasiga ah ee sida toos ka ah u taabanaya dhammaan hawlaha istaraatiijiga ah, iyo baarista uu sameeyo. Xeerka iyo siyaasadaha anshaxa ee xafiiska iyo madax-bannaanidiisa waxa ay shaqaalaha ku hagaan ku dhaqanka qiyamka xirfadeed, hal-abuurnimo, mid iskaashi, iyo la-qabsiga isbeddelka. Qiyamkan oo ay wehliyaan hiigsiga iyo himilada istaraatiijiga ah, sidoo kale waajibka sharciga ah ayaa si toos ah u taabanaya mabaad'ida xafiiska ee khuseeya hawlaha joogtada ah iyo habka go'aan gaarista.

Sanadkan 2024, XHG waxa uu dib-u-eegis ku sameeyay heerka u hoggaansanaanta qiyamka, hiigsiga, himilada iyo fulinta waajibaadka, iyada oo la xoojinayo madax-bannaanida, sir-xajinta iyo tayada shaqada. Arrinkan ma aha keliya in uu xoojiyay dhaqanka gudaha xafiiska, sidoo kale waxa uu gacan ka geystay dhisidda kartida shaqaalaha iyo ka go'naanshaha fulinta waajibaadka sharciga ah ee XHG. Isku jaangoynta Qiyamka iyo Istaraatiiyadda guud ee xafiiska, waxa ay xaqiijinaysaa in xafiiska uu diiradda saaro kor u qaadista daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo dowlad wanaagga, taas oo looga gol-leeyahay in lagu hagaajiyo maareynta maaliyadda dowladda.

### 2.5.2. U-hoggaansanaanta Halbeegyada Caalamiga ah

Waxa aan hubinaa in dhammaan hawlahaha xafiiska ay waafaqsanyihiin Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowriska Sare, oo bixinaya hannaanka baarista hay'adaha dowladda. Halbeegyadan oo uu meel-mariyay Ururka Caalamiga ah ee Hay'adaha  Hantidhowrka Sare "INTOSAI" waxaa loo aqoonsaday in ay yihiin hal-beegyo wax-ku-ool ah oo ku habboon xaqiijinta tayada baarista, hufnaanta, daahfurnaanta, iyo isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda, si waafaqsan Qodobka 5aad (19) ee Sharciga XHG (Sharci Lr 14, 2023).

XHG waxa uu dhammaan hawlaha baarista waafajiyaa halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare, taas oo lagu xaqiijinayo in baaristu noqoto mid madax-bannaan, lagu kalsoonaan karo, isla markaana waafaqsan hab-raacyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah. Meel-marinta arrinkan waxa ay xoojineysaa kalsoonida lagu qabo warbixinnada XHG, waxa ayna sare u qaadaysaa hufnaanta maareynta maaliyadda dowladda, iyada oo sidoo kale wax-ka-taraysa waajibaadka xafiiska ee ah in la horumariyo dowlad wanaagga gudaha hay'adaha dowladda Soomaaliya.

### 2.5.3. Soo-saarista Warbixinno Saameyn leh

Xafiiska waxa uu dadaal joogta ah geliyaa in uu soo saaro warbixinno tayo sare leh oo si wax-ku-ool ah loogu soo bandhigo natiijada baaritaannada, talooyin wax-ku-ool ah, laguna muujiyay meelaha u baahan in la horumariyo si loo gaaro hiigsiga dowladnimo. Shantii sano ee u dambaysay XHG waxa uu soo saaray Warbixinno lagu

daabacay af Soomaali iyo Ingiriisi. Ujeeddada ayaa ah in daneeyeyaasha kala duwan oo ay ka mid yihiin labada Aqal ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, hay'adaha fulinta dowladda, deeq-bixiyeyaasha iyo guud ahaan bulshada Soomaaliyeed ay u fahmaan si cad.

Intaas waxaa dheer, warbixinnada XHG waxa ay xoogga saaraan in daneeyeyaas-hu helaan talooyinka ku jira warbixinnada, kuwaas oo xoojinaya isla-xisaabtanka iyo dowlad wanaagga. XHG waxa uu muhiimad gaar ah siiyaa iskaashiga kala dhexeeya daneeyeyaasha muhiimka ah sida Guddiga Miisaaniyadda & Maaliyadda Baarla-maanka, si loo hubiiyo hirgelinta talooyinka, taas oo saameyn togan ku leh horu-marinta maareynta hantida guud.

## 2.5.4. Iskaashi iyo Wada-shaqeyn

Waxaa muhiimad weyn noo leh in aan iskaashi iyo wada-shaqeyn joogta ah la leen-ahay hay'adaha kala duwan ee dowladda, si loo horumariyo hannaanka maareynta maaliyadda dowladda iyo si gacan aan uga geysano kor u qaadista isla-xisaabtanka dalka oo dhan. Habkan iskaashiga wadajirka ah ayaa kaalin weyn ka qaata wax ka qabashada caqabadaha ka jira hannaanka baarista XHG, taas oo u suurtagalinaysa in la gaaro natiijooyin saameyn leh oo ku saabsan hagaajinta maamulka iyo bixinta adeegyo tayo leh.

## 2.5.5. Xiriirka Daneeyeyaasha

Hawlaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waxaa udub-dhexaad u ah xiriirkeena aan la leenahay daneeyeyaasha gudaha iyo dibedda. Waxa aan si mid ah ugu gudbinnaa warbixinnada baaritaannada hantidhowreed ee xafiiska, natiijooyinka iyo talooyinka hantidhowrka dhammaan daneeyeryasha kala duwan sida Baarlamaanka, fulinta ee DFS, bah-wadaagta horumarinta, iyo guud ahaan bulshada.

Baaqa Mexico (Mexico Declaration): INTOSAI 2007 ee madax-bannaanida Xafi-isyada Hantidhowrka Guud oo lagu kaabay go'aannadii Qaramada Midoobay (UN Resolution: 66/209, 2011 & 69/228, 2014), waxa ay muhiimad gaar ah siinayaan in Hay'adaha Hantidhowrka Guud la falgalaan Daneeyeyaasha, gaar ahaan muwaa-diniinta. Waxa aan dhisnay hab xiriirfirfircoon leh iyo wada-shaqayn tayo leh oo aan la yeelanay daneenyeyaasheena gaar ahaan bulshada, si aan u haqab-tirno baahi-da sii kordheysa ee bulshadu u qabto daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka ku aadan kharashka guud ee dowladda, loona gaaro ujeedooyinka istaraatiijiga ah ee xafiiska.

**Daneeyeyaasha ugu muhiimsan waa**

Xafiiska, isaga oo si dhaw ula shaqaynaayo dhammaan dhinacyada ay khusayso maareynta hufan ee hantida guud, hadana, daneeyeyaasha muhiimka u ah waa kuwo dowr lama huraan ah ka qaata xaqiijinta guulaha Istiraatiijiga ah ee xafiiska. Hoos waxaa ku faahfaahsan daneeyeyaasha muhiimka ah iyo kaalinta ay ku leeyihiin:

**Shaqaalaha XHG**

Shaqaalaha XHG oo dadaal joogto ah ku bixiya hirgelinta iyo ka guul gaarista qorshaha istiraatiijiga ah ee xafiiska ayaa udub-dhexaad u ah ilaalinta sumcadda iyo muuqaalka xafiiska, taas oo saameyn togan ku leh natiijooyinka hawlaha baarista. Shaqaalaha Xafiiska ayaa muujiya u heellanaan shaqo, dabacsanaan, ku dhaqanka xeerarka anshaxa, kor yeelidda qiyamka iyo madax-bannaadida, iyo horumarinta shakhsi iyo mid xirfadeed ee heerarka kala duwan ee waxqabadka xafiiska, si loo xaqiijiyo mabaadi'da iyo yoolasha istaraatiijiga ah ee xafiiska.

**Warbaahinta**

Warbaahinta oo ah isha ugu muhimsan ee ay bulshadu ka qaadato xogta, waa buundo muhiim u ah isku xirka XHG iyo bulshada, si loo hubiyo in bulshadu ay xog-ogaal u tahay natiijada baarista iyo daahfurnaanta hay'adaha dowladda. iyada oo la baahinayo shaqooyinka, guulaha, iyo caqabadaha XHG, warbaahintu waxa ay qaabeysaa fahanka bulshada waxa ayna xoojisaa isla-xisaabtanka. XHG waxa uu si toos ah xiriir ula leeyahay warbaahinta, isaga oo bixinaya wareysiyo, war-saxaafadeed iyo warbixinnada rasmiga ah si bulshada u gaarto warbixinta baarista iyo natiijada ka soo baxda si qayaxan oo sax ah. Taas ayaana gacan ka geysanaysa kor u qaadista fahamka dadweynaha ee warbixinnada hantidhowrka.

**Ururada Bulshada Rayidka**

Ururada bulshada rayidka ah waxa ay ka mid yihiin daneeneyaasha muhiim ka ah oo si garab istaag ah noola falgala, waxa ayna ka tarjumaan baahiyaha bulshada, waxa ay dhiirigilyaan hufnaanta, xoojinta isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta maareynta hantida guud. Ururadan waxa ay sidoo kale dowr muhiim ah ka qaataan u ololeynta iyo doodada qaanuuneed, taas oo waafaqsan himilada XHG. wada-shaqeynta bulshada iyo XHG, ayaa sare u qaadeysa saameynta baarista iyo ka qeybgalka bulashadu kormeerka guud ee hay'adaha dowladda.

**Bah-wadaagta Horumarka**

Bah-wadaagta horumarinta ee ay ka mid yihiin deeqbixiyeyaasha caalamiga ah iyo hay'adaha bixiya taageerada farsamo ayaa naga kaaba kobcinta awoodda XHG ee ku aadan xaqiijinta u hoggaansanaanta halbeegyada caalamiga ah, xoojinta waxtarka baarista, iyo in sare loo qaado hab-raacyada waara ee maareynta maaliyadda guud. XHG waxa uu si dhow ula shaqeeyaa bah-wadaagta horumarinta si shaqaalaha xafiiska loogu helo tababaro xirfadeed, kaamlo farsamo iyo mid maaliyadeed si loo gaaro yoolasha istaraatiijiga ah.

## 2.5.6. Warfaafinta iyo Xiriirka Bulshada

Siyaasadda Xiriirka wax-ku-ool ah ayaa gundhig u ah in aan gaarno yoolasha istaraatiijiga ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS, waana mid lagu horumarinayo isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta maamulka hay'adaha dowladda. Unugga Xiriirka Bulshada ayaa haga siyaasadda, istaraatiijiyadda iyo adeegyada xiriirka ee xafiiska, sida xiriirka warbaahinta, nashqadeynta dukumiintiyada, maareynta mareegta xafiiska iyo baraha bulshada.

Ujeeddada habkan ayaa ah sare u qaadista maqaamka XHG, kordhinta baahinta shaqada uu qabto xafiiska iyo saameynta uu ku leeyahay maareynta maaliyadda guud ee dalka. Istaraatiiyadda xiriirka-shaqo waxa ay ku dhisan tahay in la fududeeyo xiriirka joogtada ah ee aan la leenahay daneeyeyaasha muhiimka ah, sida hay'adaha dowladda, ururada bulshada rayidka, iyo bahwadaagta horumarinta si loo xaqiijiyo wacyigelin ballaaran iyo faham qoto dheer oo ku saabsan hannaanka baarista iyo natiijooyinka la gaaray.

### 2.5.7. Maamul Wanaagga

Dowrka XHG ee doonista dowlad wanaagga waa mid dhaafsan hubinta u hoggaansanaata sharciga, waxa uuna bixiyaa talooyin la fulin karo oo looga gol leeyahay xoojinta waxtarka iyo waxqabadka dowladda, iyo sidoo kale heerka ka jawaabidda baahida muwaadiniinta.

Sidoo kale, XHG waxa uu hawlihiisa waafajiyaa Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare si uu u xoojiyo daacadnimada, anshax wanaagga, dhexdhexaadnimada iyo dhammaan hannaanka baarista. Dadaallada joogtada ah ee XHG ayaa gacan ka geysanaya abuurista nidaam dowladeed oo lagu kalsoonaan karo, si loo gaaro yoolasha horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka.

### 2.5.8. Fulinta Istaraatiijiyadda, Qorsha Hawleedka iyo Hawlmaalmeedka Xafiiska

XHG waxa uu hubiyaa in si wax-ku-ool ah loo dhaqangaliyo istaraatiijiyadda, qorsha-hawleedka iyo hawl-maalmeedka isaga oo dejinaya qorshe sanadeed dhammeystiran oo dhigaya hortabinnada muhiimka ah, hawlo la qabanayo iyo xilligooda. Qorshe hawleedka sanadlaha ah oo xambaarsan Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka iyo qorshe hawleedyo kale oo sanad walba billowgiisa ah waxa ay ka dhigan yihiin halka ay deeq-bixiyeyaashu ka eegtaan waxqabadka XHG.

Dhammaan qorsheyaasha xafiiska waxa ay salka ku hayaan Qorshaha Istaraatiijiyadda 2023-2027, iyada oo la hubinayo in la waafajiiyay yoolasha iyo ujeedooyinka XHG.

### 2.5.9. Kormeerka iyo Qiimaynta

Si loo hubiyo isku xirnaanta iyo hagaajinta natiijooyinka, XHG waxa uu adeegsadaa hab nidaamsan oo ku qotoma kormeerka iyo qiimeynta. Habkan oo isugu jira dib-u-eegista waxqabadka saddexdii biloodba mar, kulan hawleedyada joogtada ah ee shaqaalaha, iyo qiimeynta ay sameeyaan saaxiibbada kale ee daneeyeyaasha waa mid udub dhexaad u ah fulinta qorsheyaasha istaraatiijiyadda iyo hawlaha. Sidoo kale, hHabkan nidaamsan waxa uu gacan ka geysanayaa in si degdeg ah loo aqoonsado caqabadaha, lala qabsado duruufaha isbedbeddelaya, iyo in isha lagu hayo gaarista yoolalka istiraatiijiga ah.

Habka Kormeerka iyo Qiimeynta waa hab muhiim ah oo wax ka tara maamulka iyo natiijada hawlaha XHG. Kormeerka joogta ah ayaa sahlaya in si dhab ah loola socdo waxqabadka, taas oo keeneysa in la qaadi karo tallaabooyin toosin ah oo ku habboon, si tayada baarista iyo wada-shaqeynta daneeyeyaasha loo horumariyo. Agaasimayaasha XHG waxay qabsadaan kulamo joogto ah oo ay kaga wada hadlaan

horumarka la gaaray, xogaha soo kordhay, iyo sidii loo xoojin lahaa wada-shaqeynta dhexdooda ah.

Intaas waxaa dheer, kormeerka xilliyeysan oo ay ku jiraan dib-u-eegista ay sameeyaan daneeyeyaasha ayaa loo adeegsadaa cabbirka heerka fulinta qorshaha iyo xaqiijinta in yoolalka istiraatiijiga ah la gaaray. Habkan kormeerka iyo qiimeynta oo dhammeystiran waxa uu xoojinayaa himilada XHG ee ah in la horumariyo daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo dowlad wanaagga ku aaddan maamulka maaliyadda guud ee Soomaaliya.

## 2.5.10. Warbixinta Waxqabadka iyo Tabaha Isla-xisaabtanka

Waxaa naga go'an in aan si joogto ah oo daahfuran u soo saarno warbixinta waxqabadka xafiiska, lana wadaagno daneeyeyaasha  ay ka mid yihiin Baarlamaanka, Hay'adaha Dowladda, Bahwadaagta Horumarinta, iyo guud ahaan bulshada. Warbixinnadani kama tarjumayaan keliya in XHG laasimo halbeegyada caalamiga ah ee baarista, waxa ayna sidoo kale sahlayaan in la helo qiimayn dhab ah oo wax ka tarta hawlaha shaqada iyo natiijooyinka istiraatiijiga ah.

XHG waxa uu leeyahay hab-raac dhisan oo lagu diyaariyo warbixinta waxqabadka, kaas oo mideeya wixii ka soo baxa baarista u-hogaansanaanta sharciga, baarista maaliyadda, baarista fatashka,  baarista nidaamka tiknoolajiyadda iyo baarista waxqabadka. Warbixinnadani waa la isu keenaa, oo la tifatiraa, kadibna loo kala diraa daneeyeyaasha  Sanadkiiba mar, iyada oo la hubinayo in wixii ka soo baxay baaritaannada iyo talooyinka aan bixinnay la gaarsiiyay xilli hore. Si tayada xogta iyo saxnaanta warbixinta loo xoojiyo waxa aan si feejigan u hirgelinay Nidaamka maareynta Xogta oo wax ka tara habka maareynta xogta waxqabadka xafiiska.

Tabaha isla-xisaabtanka ee XHG waxaa ka mid ah kormeer joogta ah, qiimaynta baaritaannadii qabsoomay si loo hubiyo in gunaanadka baaritaannada lagu adkeeyay caddaymo ku filan oo xiriir la leh. Waxaa, sidoo kale, si loo xoojiyo tabahaas la hirgeliyay Hannaanka Dhismaha Awoodda Hay'adda (ICBF), iyada oo diiradda lagu saarayo in la dhiso awoodda gudaha, lana xoojiyo taya-dhowrka xafiiska. Isla-xisaabtan wadareedka ka jira waaxaha kala duwan ee xafiiska waxa aan ku xaqiijinaa in hannaanka diyaarinta warbixinta uu noqodo mid dheelitiran, iyo joogteynta habka warbixinta, taas oo adkeyneysa kalsoonida daneeyeyaasha  iyo bulshada intaba.

## 2.6. Qorshaha Qiimeynta Khataraha Baarista

Qorshaha baarista ku salaysan khataraha waa istaraatiijiyad muhiim ah oo suurtagelinaysa in aan garanno meelaha khataraha badan ay ka jiraan ee gudaha hay'adaha dowladda, si aan sida ugu habboon ugu qoondeyno kheyraadkeena, una abbaarno baaritaannada ay ka jirto cabsida ugu badan eemaamul-xumada maaliyadeed, midda u-hoggaansanaan la'aanta sharciyadeed, iyo midda waxqabad-xumada. Habkani waxa uu si taban u saameynayaa waxtarka baarista, waxa uuna sare u qa-

adayaa saamenyta shaqadeena, waana hab aan ugu talagalnay in aan ku baahinno isla-xisaabtanka, daahfurnaanta iyo dowlad wanaagga gudaha dhammaan hay'ada-ha dowladda.

Waxyaabaha ugu muhumsan ee caddaynaya in "Qorshaha Baarista Xambaarsan Khataraha" uu muhiim u yahay hawlaheena baarista waxaa ka mid ah:

- **Qoondeynta Kheyraad Waxtar leh:** Marka XHG uu si buuxda uga salgaaro meelaha khataraha ugu badan ay ka jiraan waxa uu awood u helayaa in uu si istaraatiiji ah u qoondeeyo kheyraadka hawlaha baarista, isaga oo mudnaanta kowaad siinaya baarista meelaha ugu khatarta badan, barnaamijyada iyo hawla-ha hortabinta u leh xafiiska oo horseedi kara waxtar saameyn leh.
- **Yareynta Khatarta:** Habkan Qorsheynta Baarista Xambaarsan Khataraha waxa uu XHG u suurtagelinayaa in uu xilli hore ogaado khataraha ka jira ama la filan karo ee ku gadaaman hay'adaha dowladda, barnaamijyada iyo sidoo kale hab-raacyada shaqada baarista. Iyada oo la racaayo Habkan, waxa aan soo jeed-innaa tabo lagu xakameynayo iyo istaraatiijyad lagu yareynayo khatarta, si looga dhowrsado in ay arrimuhu faraha ka baxaan, taas ayeyna ku jirtaa horumarka hawlaha shaqo ee dowladda.
- **Xoojinta Baaxadda Baarista:** Habkan Qorshaha Baarista Xambaarsan kha-taraha waxa uu xoojiyaa in baaritaannada aan u weecinno meelaha xasaasiga ah, sida maamulka maaliyadda, waafaqsanaanta shuruucda, iyo waxtarka bar-naamijyada. Baaritaannada sidan baaxadda u leh waxa ay na siiyaan aragtiyo iyo talooyin dhaxalgal ah oo wax ka tara dowlad wanaagga, maareynta maaliyadda, iyo adeeg bixinta.
- **Kobcinta Kalsoonida Dadweynaha:** Qorshaha Baarista Xambaarsan Khataraha waxa uu muujinayaa sida XHG ay uga go'an tahay wax ka qabashada khataraha waaweyn ee ka jira gudaha dowladda. Baaritaannada bartilmaameysan ee ku dhisan qiimeynta khataraha waxa ay noo sahlayaan in aan bannaanka soo dhi-gno khaladaadka, wax is-daba-marinta, iyo musuqmaasuqa, taas oo kordhisa kalsoonida bulshadu ku qabto awoodda waxqabad ee hay'adaha dowladda in ay si wax-ku-ool ah u maamuli karaan kheyraadka ummadda.
- **Go'aan-qaadashada Taageerada Istiraatiijiyadeed:** Qorshahan Baaritaannada Xambaarsan Khataraha waxa uu cidda go'aanka leh fahan buuxa ka siiynayaa khataraha ku gadaaman barnaamijyada iyo hawlaha dowladda. Wixii ka soo baxa baaritaannadaas ee natiijo ah iyo talooyinka baaritaannadaas xambaar-san khataraha ayaa Baarlamaanka iyo hay'adaha dowladda ku dardargeliya in ay gaaraan go'aanno ku dhisan xog-ogaalnimo, ayna qaadaan tallaaboyin wax saxa oo lagu xaqiijinayo in si waxtar leh loo qoondeeyo kheyraadka, iyo in la hagaajiyo waxqabadka hay'adaha dowladda.
- **Horumar Joogto ah:** Habkan la diyaariyay waxa uu kaabayaa ka go'naanshiya-heenna joogteynta horumarka annaga oo mar walba qiimeyn ku sameynayna khataraha soo kordha iyo kuwa isbeddelaya ee hay'adaha dowladda. Waxa ay

taasi xafiiska u suuragelinaysaa in uu ku jaangooyo hannaankiisa baarista, uuna bartilmaameedsado meelaha ay ka jiraan khatara cusub, si hannaanka baarista uu u ahaado mid adag oo fuli kara, isla markaana ku haboon khatara isbedbedlaya.

# 3. HAWLAHA BAARISTA & WARBIXINNADA 2023 & 2024

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu sanadihii ugu dambeeyay xoogga saaray bal-laarinta iyo horumarinta hab-raaca baaritaannada uu sameeyo. Ujeedada dadaalladaas istaraatiijiga ah ee kordhinta baaxadda hawlaha baarista ayaa ah in la hubiyo in la baaray hey'ado kala duwan oo heer maamul iyo heer maaliyadeedba leh, taas oo uu XHG ku xoojinayaa isla-xisaabtanka, hufnaanta, iyo ilaalinta hantida ummadda.

Sidoo kale, XHG waxa uu diiradda saarayaa horumarinta tayada guud ee hab-raaca baarista oo ay ku jirto hirgelinta heerar adag iyo hannaanka la isku waafaqsan yahay si loo hubiyo in dhammaan baarisyada kala duwan ay noqdaan kuwo dhammaystiran, madax-bannaan, oo suurtagelinaya in la ogaado meelaha u baahan horumarinta gudaha hay'adaha la baarayo.

Si ay warbixinta u yeelato saameyn wax-ku-ool ah, natiijada iyo talooyinka ku xusanna loo fahmo si dhameestiran, XHG waxa uu warbixinnada ku daabacaa afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska. Habkan labada luqad ah ayaa lagu xaqiijinayaa in warbixintu gaarto cid walba oo ay ugu horreeyaan daneeyeyaasheena, hay'adaha dowladda, iyo guud ahaa ummadda, taas oo xoojinaysa is dhexgal-ka iyo fahanka guud ee ujeedka baaritaannada.

Ujeedka dadaalladan joogtada ah ayaa ah in XHG ku muujiyo dowrkiiysa adkeynta dowlad wanaagga iyo mas'uuliyadda ka saaran maaliyadda, si uu uga qeyb-qaato hagaajinta adeeg bixinta hay'adaha dowladda.

Jadwalkan soo socda waxa uu tusaale ka bixinayaa isbarbardhigga yoolalka la filayay ee la xiriira natiijooyinka baaritaannada iyo natiijooyinkooda sanadihii 2023 iyo 2024.

| Wax-soo-saarka la filayay | Tusaha in natiijadii la filayay la gaaray iyo in kale. | Sida lagu garto Cabbir Tusaha | Gundhigga (Sanad) | Hiigsiga 2023 | Hiigsiga 2024 | Natiijada |
|---|---|---|---|---|---|---|
| In la soo saaro baaris maaliya-deedka DFS oo tayeysan taas oo wakhtigeeda lagu gudbiyo sanad kasta | In baarista xisaab-xir maali-yadeed ee sanadlaha DFS loo gudbiyay aarlamaanka Mud-dada uu sharcigu jideeyey | Juun 30 keeda sannad kasta | Waa laga dib dhacay | Lagama dib-dhicin | Lagama dib-dhicin | Waa lagu guulaystay |
| Baarista sanadlaha ah ee u-Hoggaansanaanta Sharciga oo tayo sare leh, loona eegayo caqabadaha waaweyn ee ku gadaaman u-hoggaansanaanta. | Tirada baaritaanada dham-meystirmay ee Baarista u-Hoggaansanaanta Sharci-ga, kuwaas oo lagu sameeyay goobo la ogaaday in khatar ka jirto sida lagu qeexay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka. | Tirakoobka hay'adaha dowladda la baaray iyo tirada baaritaan-nada u-Hoggaansa-naanta Sharciga ee la sameeyay, marka loo eego Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka ee la ansixiyay. | 97% oo ah 39 hay'ad. Markii loo eego 40 la qor-sheeyay (2022) | 100% | | Waa lagu guulaystay |
| Baarista Gaarka ah oo tayo sare leh oo lagu sameeyo goobo cayiman oo danta guud ah, sida Xogta Nidaamyada iyo Caqba-daha Deegaanka. | Tirada baaritaannada dhammeystirmay ee Baarista Gaarka ah ee khuseeyso haw-lo cayiman oo danta guud ah, sida lagu qeexay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka. | Tiro-koobka Baari-taannada Gaarka ah ee la dhammeystiray, lana faafiyay, sida lagu qeexay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka ee la ansixiyay. | 100% (2022) | 100% | | Waa lagu guulaystay |
| Baaris Fatash oo si tayo sare leh loogu sameeyo arrimaha kha-tarta leh ee la xiriira maaliyadda, sida musuqa, lunsiga iyo ku takri-falka hantida dowladda. | Tirada baaritaannada dhammeystirmay ee Baarista Fatashka ee loo gudbiyey hay'adaha ay khuseyso, si tallaabo sharci ah ama dib-u-eegis maamul loogu sameeyo. | Tirakoobka Baarita-annada Fatashka ee la dhammeystiray, loona gudbiyay hay'adaha sharciga, sida ku qeex-an Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka ee la ansixiyay. | 0 (2022) | 100% | | Waa lagu guulaystay |

| Wax-soo-saarka la filayay | Tusaha in natiijadii la filayay la gaaray iyo in kale. | Sida lagu garto Cabbir Tusaha | Gundhigga (Sanad) | Hiigsiga 2023 | Hiigsiga 2024 | Natiijada |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Baaris Waxqabad oo si tayo sare leh loogu sameeyo arrimo danta guud ah, muhiimna u ah Qaran-ka, sida Yoolasha Horumarka Waara. | Tirada baaritaannada dham-meystirmay ee Baarista Wax-qabadka, ee khuseeyo arrimo la xiriira Yoolalka Horumarka Waara (SDGs), loona gudbiyay Baarlamaanka DFS. | Tirakoobka Baaritaan-nada Waxqabadka ee la dhammeystiray marka loo eego Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka ee la ansix-iyay. | 0 (2022) | 1 | | Waa lagu guulaystay |
| Kordhinta dowrka XHG ee ku aaddan mashaariicda deeq-bix-iyeyaasha, iyo in baaritaanno waqtiyeysan, tayo sare leh oo lagu sameeyo mashaariicda noocaas ah. | Tirada baaritaannada dhammeystirmay ee Baarista Mashaariicda Deeq-bixiy-eyaasha ee la gudbiyay sida uu waqtiga  sharcigu qabo. | Tirakoobka mashaa-riicda ay maalgeliyeen deeq-bixiyeyaasha ee la baaray, laguna gudbiyay waqtigii loogu talagalay marka loo eego tirada guud ee la qorsheeyay. | 19 (2022) | | | Waa lagu guulaysay |
| In natiijooyinka baarista XHG si ballaaran loo gaarsiiyay bulshada, iyo in la joogteeyay xiriirka muwaadiniinta, si fiiro dheer loogu yeesho xulashada baaritaannada iyo hab-raacyada saxda ah. | In dhammaan warbixinada hantidhowrka laga heli karo mareegta (website), loona faafiyay si ballaaran iyada oo la ilaalinayo waqtiga sharciga ah iyo tirada kulammada dad-weynaha ee qabsoomay. | In la hubiyo Mareegta iyo Baraha Bulshada | Haa (2022) | Haa | Haa | Waa lagu guulaystay |

## 3.1. Warbixinnada Baarista Hantidhowrka ee la soo saaray 2023

### 3.1.1. Warbixinta Baarista Maaliyadeed

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS  waxa uu si habsami leh u fuliyay sanadkii tagay ee 2023 baarista maaliyadeed ee xisaab-xirka sanad-maaliyadeedka dhammaaday 31 December 2022. Xisaab-xirka maaliyadeed ee uu diyaariyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa lagu jaangooyay Halbeegga Adeegsiga Lacagta Caddaanka ah sida ku cad Hab-raacyada Xisaabaadka Guud ee Caalamiga ah (IPSAS), waxaana si faahfaahsan loogu muujiyay waxqabadka maaliyadeed ee sanadka 2022, oo ay ku jiraan dakhliga, kha-rashaadka, iyo qodobbo kale ee la xiriira miisaaniyadda.

Hantidhowraha Guud ayaa warbixintiisa gunaanad uga dhigay in natiijada Baarista Maaliyadda 2023 ay muujisay fikrad cilad leh taas oo ka dhigan saxnaanshaha xisaab-xirka balse ay jiraan kala duwanaansho iyo gaabis xagga xisaabinta ah oo u baahan in wax laga qabto.

Warbixinta Baarista Maaliyadda ayaa markii ugu horreysay waqtigii loogu talagalay lagu gaarsiiyay Baarlamaanka, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisul Wasaaraha. Warbixinta waxaa sidoo kale ku jiray talooyin waxtar leh oo ku aaddan hagaajinta hannaanka xisaabinta maaliyadeed, taas oo ay ujeedadeedu tahay in lagu xoojiyo hufnaanta maaliyadeeda, isla-xisaatanka iyo dowlad wanaagga.

### 3.1.2. Warbixinta Baarista U-oggaansanaanta Sharciga

Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee XHG uu sameeyay sanadkii 2023 ayaa lagu baaray 15 hay'ado dowladeed (Wasaaradaha, Waaxyaha, iyo Wakaaladaha) sida uu dhigayay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka ee la ansixiyay sanadkii 2022. Baarista ayaa diiradda lagu saaray u-hoggaansanaanta sharciga, fulinta xeerarka, iyo hab-raacyada ugu wanaagsan ee lagu maamulo arrimaha sida: Hannaanka Maamulka Iibka Alaabta, Adeegga iyo waxyaabaha kale ee baarista.

Natiijada Baarista ayaa sheegtay in hay'ado badan aysan u hoggaansamin habka loogu talagalay, taas oo abuureysa walaac dhanka maamulka iyo isla-xisaabtanka ah. Warbixinta ayaa lagu xusay talooyin wax-ku-ool ah oo loogu talagalay in si hufan loogu xalliyo arrimaha taagan.

### 3.1.3. Warbixinta Baarista Gaarka ah

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu sanadkii 2023 qorsheeyay in uu sameeyo saddex baaris oo gaar ah, kuwaas oo lagu fulinaayay shan safaaradood oo ay DFS leedahay, Maamulka Gobolka Banaadir iyo Heshiisyo Qandaraas oo u dhexeeya Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, Favori LLC iyo Decale Hotel.

Baarista Gaarka ah, oo sida qorshuhu ahaa ay aheyd in laga sameeyo shan safaaradood, ayaa waxaa suurtagashay in lagu fuliyo saddex safaaradood oo kaliya. Baaristan ayaa loogu kuurgalayay maareynta dakhliga, kharashaadka, deymaha, hantida ummadda, iyo maamulka shaqaalaha. Warbixinta ayaa soo bandhigtay natiijooyin baaris, iyada oo si dhow loogu lafa-guray hab-raacyada iyo xakameynta la xiriirta mowduucyadaas. Warbixinta waxaa qeyb ka ahaa talooyin wax-ku-ool ah oo loogu talagalay in lagu xalliyo habacsanaanta iyo gaabiska la helay intii lagu jiray baarista, iyada oo ujeeddadu tahay in kor loo qaado tayada waxqabad ee safaaradaha dalka.

Baarista Gaar ka ah ee la qorsheeyay in lagu sameeyay gobolka Banadir ayaa la billaabay dhammaadka 2023, warbixintiisana la soo saaray 2024; halka baarista la qorsheeyay in lagu sameeyo Heshiisyada Qandaraasyada ay Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada (WGDH) la gashay labada shirkadooda ee kala ah Favori LLC iyo Decalle lagu fuliyay waqtiga loogu talagalay, iyada oo ay ujeeddada baaritaanku ahayd mid lagu qiimeynayo u- hoggaansanaanta shirkadahan shuruucda dalka iyo hirgelinta shuruudaha lagu qeexay qandaraasyada la saxiixay.

## 3.1.4. Warbixinta Baarista Nidaamyada Tiknoolajiyadda

Xafiiska Hantidhowrka Guud ayaa, sida u qorsheyneyd sanadkii hore ee 2023, si habsami leh u fuliyay labo baaris oo lagu sameynayay labo nidaam macluumaad (two information systems) ee kala ah Nidaamka Maamulka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda iyo Nidaamka Xogta Shaqaalaha ee Hay'adda Nabadsugidda Qaranka.

Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS Audit) ee la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ay ka jiraan nugeyl khatar ah dhanka habsami-u-socodka hwsha, hubinta aaladda, hubinta amniga xogta iyo hubinta guud ee nidaamka. Warbixinta ayaa wadatay talooyin wax-ku-ool oo looga gollahaa dib-u-hagaajinta nidaamyada, waxaana labada nidaamba lala wadaagay cidda ay khuseyso warbixintooda.

## 3.1.5. Warbixinta Baarista Fatashka

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu sanadkii 2023 fuliyay Baaris Fatash oo loogu kuurgalay sida loo maamulay dakhliga dowladda uga soo xarooda Ruqsadda Shaqada iyo cusbooneysiinta Dal-ku-joogga, adeegga baasaboor bixinta. Baarista Fatashka waxaa lagu sameeyay hay'adaha dowladda ee bixiya adeegyadaas. Wax-is-daba-marin baahsan ayaan ogaannay in ay ka jirto meelaha aan soo sheegnay, taas oo lagu lunsaday hanti malaayiin doollar ah

Warbixinta rasmiga ah ee baarista fatashka waxaa loo gudbiyay Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, sida uu dhigayo hab-raaca Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud . Gal-dacwadeed ayaa intaas kadib loo gudbiyay hay'adaha garsoorka, iyada oo ugu dambeyntiina lagu mariyay maxkamadeyn si toos ah looga baahiyay warbaahinta.

Baarista Fatashka kadib, waxaa koror muuqda ku yimid dakhliga ka soo xarooda adeegyada dowladda ee kala ah Dal-ku-joogga iyo Ruqsadda Shaqada iyo adeegga baasaboor bixinta. waxaana halkaas ka cad waxtarka Baarista Fatashka ah iyo muhiimadda ay leedahay in la helo hubin adag ee nidaamka maaliyadda, iyo korjoogteynta hay'adaha dowladda Soomaaliyeed, si looga hortago musuqa iyo lunsashada hantida ummadda.

## 3.1.6. Warbixinta Baarista Waxqabadka

Sanadkii 2023, XHG oo ka duulaya baahida muhiimka ah ee loo qabo qiimeynta waxqabad ee hay'adaha dowladda iyo waxtarka mashaariicda fulintoodu socoto waxa uu markii ugu horeysay buddhigay Waaxda Baarista Waxqabadka. Ujeedka ugu weyn ee loo unkay ayaa ah in laxoojiyo isla-xisaabtanka, hufnaanta iyo wax-ku-oolnimada maareynta kheyraadka ummadda, loona adkeeyo dowlad wanaagga Soomaaliya.

Billowgii shaqada, XHG waxa uu qorsheeyay in uu sameeyo labo baaris oo tijaabo ah, labada baaris ayaa kala ahaa Mashruuca "Biyoole"- iyo Mashruuca "SCRP" ee uu maalgaliyo Bankiga Adduunka. Daraasad hordhac ah oo uu xafiisku sameeyay ayaa muujisay muhiimadda ay leedahay in la baaro mashaariicdan, maadaama si isku mid ah looga hirgelinayay inta badan Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Baarista Waxqabadka ee labadan mashruuc oo soo billaabatay dhammaadka 2023 ayaa warbixinta baarista la soo saaray sanadkii 2024. Dadaalkan ayaa gogol-xaar u ah Baaritaannada Waxqabadka ee la qorsheynayo in la fuliyo mustaqbalka soo socdo. Waxaa kale oo dadaalkan lagu muujiyay sida XHG ay uga go'an tahay xoojinta hufnaanta iyo isla-xisaabtanka.

## 3.2. Warbixinnada Baarista Hantidhowrka ee 2024

### 3.2.1. Warbixinta Baarista Maaliyadeed

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa uu si rasmi ah u soo saaray baarista sanadlaha ah ee lagu sameeyay Xisaab-xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ee sanad maaliyadeedka dhammaaday 31 December 2023. Xisaab-xirka maaliyadda dowladda ee uu diyaariyay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa ah mid lagu jaangooyay Halbeegga Adeegsiga Lacagta Caddaanka ah sida ku cad hab-raacyada Xisaabaadka Guud ee Caalamiga ah (IPSAS). Baarista Maaliyadeed ee XHG waxaa la fuliyay iyada oo la raacayo Sharciyada dalka iyo Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare, si qiimeyn madax-bannaan loogu sameeyo xisaab-xirka, loona xoojiyo hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo in si sax ah loo maareeyo kheyraadka ummadda. Natiijadda baarista warbixinta maaliyadeedka ee sanadka 2024 ee uu Hantidhowraha Guud soo saaray ayaa ahayd fikrad xaddidan.

Warbixintan waxa ay si gaar ah u muujisay kala duwanaanshaha iyo gaabiska xagga xisaabinta, iyada oo soo bandhigtay talooyin wax-ku-ool ah oo lagu hagaajinayo maareynta maaliyadda hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Sidaas darteed, Hantidhowraha Guud waxa uu talo ku bixiyay in hawlaha ka baxsan miisaaniyadda lagu daro xisaab-xirka rasmiga ah, in la xoojiyo kormeerka hab-raacyada maaliyadeed, iyo in habka xisaab-xirka la waafajiyo hab-raacyada "IPSAS".

Hantidhowraha Guud ayaa warbixinta Baarista Maaliyadeed si rasmi ah ugu gudbiyay labada Aqal ee Baarlamaanka, Madaxweynaha JFS, iyo Ra'iisul Wasaaraha 30ka Juun, 2024. Gudbintan xilliyeysan waxa ay muujinaysaa sida XHG ay uga go'an tahay horumarinta hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo maamulka waxtarka leh ee kheyraadka guud.

### 3.2.2. Baarista u-oggaansanaanta Sharciga

Sannadka 2024, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu si rasmi ah u soo saaray warbixinta sanadlaha ee Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ee sanad maaliyadeedka dhammaaday 31ka December 2023, sida ku cad Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka ee la ansixiyay. Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga sanadkan ayaa lagu sameeyay 19 Wasaaradood, Waaxyo, iyo Hay'ado ka mid ah Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS), kuwaas oo lagu soo xulay iyada oo la adeegsanayo habka qorsheynta baarista xambaarsan khataraha, waxaana sal looga dhigay Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (ISSAIs). Baaristan ayaa mudnaanta la siiyay dhinacyo muhiim ah sida hannaanka wax-soo-iibsiga, maamulka hantida, ururinta dakhliga,

siyaabaha baarista gudaha, ka faa'iideysiga deeqaha dibedda, diiwaangelinta iyo shatiga adeeg-bixiyeyaasha caafimaadka iyo shirkadaha amniga gaarka ah, bixinta ruqsadda shaqada, kormeerka mashaariicda dhismaha waddooyinka, iyo wax-soo-saarka xoolaha.

Natiijada Warbixinta Sanadka ee Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ayaa muujisay in ay jiraan daldaloollo dhanka u-hoggaansanaanta sharciga hannaanka wax-soo-iibsiga, gaabis ba'an oo dhanka maareynta hantida dowladda ah, ku takri-fal hab-raaca ururinta dakhliga, ka faa'iideysi xumi deeqaha dibedda iyo maam-ulka koontooyinka bankiyada. Waxyaabaha kale ee ku xusan warbixinta waxaa ka mid ah habacsanaan ka jirta isla-socodka Waaxyaha Wasaaradaha qaar iyo dib-u-dhac ba'an oo ka jiray mashaariicda dhismaha waddooyinka ee hoos yimaada Wasaaradda Hawlaha Guud. Hantidhowraha Guud waxa uu walaac xoogan ka muu-jiyay in 11 ka mid ah 19ka hay'adooda ee la baaray aysan lahayn hab-raac saxan oo baarista gudaha ah. Warbixinta oo bidhaaminaysa muhiimadda qaababka u hog-gaansanaanta wax-ku-oolka ah ayaa soo jeedisay talooyin dhaxalgal ah oo wax loo-ga qaban karo arrimaha taagan, si loo hagaajiyo maamulka maaliyadda dowladda iyo heerka adeeg bixinta.

Hantidhowraha Guud waxa uu Warbixinta Baarista U-hoggaansanaata Sharicga, si rasmi ah ugu gudbiyay Labada Aqal ee Baarlamaanka, Madaxweynaha JFS, iyo Ra'iisul Wasaaraha 30ka Juun 2024. Gudbintan waxa ay ka tarjumaysaa sida XHG ay uga go'an tahay xoojinta isla-xisaabtanka iyo in la hubiyo habka loo maamulo kheyraadka ummadda.

## 3.2.3. Baarista Gaarka ah

Sida ku cad qorshaha guud ee baarista 2023, Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu qorsheeyay shan Baaris Gaar ah oo diiradda lagu saaray goobo cayiman oo ay khataro ka jiraan, kuwaas oo isugu jiray safaarado, hay'ado dowladeed, iyo heshiisyo dheef-wadaag ah oo ay DFS gashay. Baaritaannadan ayaa loogu kuurgalay dhina-cyada dakhli ururinta, maareynta kharashaadka, deymaha, hantida ummadda, iyo maamulka shaqaalaha.

**Baarista Gaarka ah ee Safaaradaha**

Safaaradaha DFS ee la qorsheeyay in Baaris Gaar ah lagu sameeyo sanadkan waxaa ka mid ahaa:

- Safaaradda Soomaliya ee Nairobi, Kenya
- Safaaradda Soomaliya ee New Delhi, India
- Safaaradda Soomaliya ee Riyadh, Kingdom of Saudi Arabia (Safaaradda, Qunsu-liyadda, iyo Guddiyo)
- Safaaradda Soomaliya ee Washington, D.C., U.S.A.

XHG waxa uu si buuxda u dhammeystiray baarista Safaaradaha Nairobi, Kenya; New Delhi, India; iyo Riyadh, KSA, halka baarista Safaaradda Washington, D.C., USA, loo dib dhigay sanadaha soo socdo.

**Baarista Gaarka ah ee Hay'adaha Kale**

Baaritaannada hay'adaha kale ee dowladda ee la fuliyay ama soo dhammeystirmay sanadkan waxaa ka mid ah:

- Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka (Adeegga Xajka iyo Cumrada)
- Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed
- Heshiiska Dheef-Wadaagga ee Mogadishu Airport Corp. (ALPORT ee Albayrak-Somalia)
- Maamulka Gobolka Banaadir

Baarista Gaarka ah ee lagu fuliyay Hay'adahan ayaa lagu dhammeystiray waqtigii loogu talagalay, marka laga reebo baarista heshiiska Mogadishu Airport Corp. (ALPORT ee Albayrak-Somalia) oo wali socota.

XHG waxa uu warbixinta rasmiga ee Baarista Gaarka ah la wadaagay daneeyeyeesha. Warbixintan ayaa xambaarsan talooyin wax-ku-ool ah si loo horumariyo hufnaanta iyo maareynta hay'adaha dowladda, taas oo qeyb ka ah dadaalka lagu xoojinayo kalsoonida iyo hufnaanta nidaamyada maaliyadeed iyo maamulka guud.

### 3.2.4. Warbixinta Baarista Nidaamyada Tiknoolajiyadda

Sida ku cad Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka 2024 ee la ansixiyay, XHG waxa uu hirgalay dhammaan baarista saddex Nidaam Macluumaad (IS Audit) oo aad muhiim ugu ah Dowladda Federalka Soomaaliya, ayna u adeegsato arrimaha maaliyadda iyo dakhli ururinta. Saddexda Nidaam Macluumaad ayaa kala ah Somali Customs Automated System (SOMCAS), Somali Revenue Collection System (SRCS) iyo Somali Financial Management Information System (SFMIS). Ujeeddada baarista ayaa ku qotantay in la hubiyo in dhammaan xogta lagu abuuro, maareeyo, keydiyo, laguna soo-saaro aaladda nidaamyadan ay tahay mid sax ah, dhammaystiran, lana heli karo marxalad walba oo ay mareyso, billow ilaa dhammaad.

Warbixinta ayaa soo saartay natiijo muujinaysa baahida loo qabo in la xoojiyo habka hubinta Aaladda, la wanaajiyo isku-xirka nidaamyada, iyo in la waafajiyo hab-raacyada ilaalinta xogta si loo xaqiijiyo yoolalka maamul maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

XHG waxa uu soo jeediyay talooyin gaar ah si wax looga qabto baahiyahaas, waxa uuna soo saaray warbixin mideysan oo ku saabsan saddexda nidaam macluumaad.

### 3.2.5. Baarista Waxqabadka

Sanadka 2024, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu sii xoojiyay waaxda ugubka ah ee Baarista Waxqabadka, oo looga gollahaa in qiimeyn qoto-dheer lagu sameeyo waxtarka waxqabad ee hay'adaha dowladda iyo mashaariicda madaxa-bannaan, taas oo muujinaysa sida ay nooga go'an tahay in la horumariyo tabaha isla-xisaabtanka iyo in la helo hufnaan dhab ah. Baarista waxqabad ee sanadkan waxaa diiradda lagu saaray dhammaystirka la-

badii baaris-tijaabo ee waxqabad (2-Pilot Performance Audits) ee la soo bilaabay sanadkii hore ee 2023. Labada mashruuc oo kala ah Mashruuca "Biyoole" (Water for Agro-Pastoral Productivity and Resilience) oo ku kacaya deeq dhan $42 milyan, iyo Mashruuca "SCRP" (Somali Crisis Recovery Project), oo ku kacaya deeq dhan $187.5 milyan, oo uu labadaba maalgeliyay Bankiga Adduunka, ayaa u muuqday kuwa u nugul khataraha, waxaana la doortay in lagu sameeyo baaris loogu kuurgalayo waxtarka laga filayay.

Warbixinta Baarista Waxqabadka ayaa muujisay in labada mashruuc ay ka jiraan habacsanaan dhanka waxqabadka ah, kormeer yari, iyo u hoggaansanaan la'aan dhanka cabirka tayada ah; waxaas oo dhan ayaa loo arkay in ay wiiqayaan faaiidooyinka laga filayay mashaariicdan. Gunaanadka warbixinta ayaa XHG waxa uu bixiyay talooyin gaar ah oo wax ka tari kara arrimahan si loo waafajiyo hab-raacyada caalamiga ah ee mashaariicda waara, waxaana Warbixinta Baarista Waxqabadka lagu sameeyay labadan dan mashruuc lala wadaagay dhinacyadda ay khuseyso.

Xafiiska Hantidhowraha Guud ayaa sida uu sharcigu farayo soo saaray warbixinta rasmiga ah ee Baarista Waxqabadka sanadkan, una gudbiyay Barlamaanka, Madaxweynaha JFS iyo Ra'iisal Wasaaraha 30ka August 2024. Warbixintan ayaa ka dhigan tab lagu hubinayo in mashaariicda mustaqbalka loo fuliyo si dhab ah, lana xaqiijiyo himilada iyo yididiillada shacabka Soomaaliyeed.

### 3.2.6. Warbixinta Baarista Mashaariicda ay Deeq-bixiyeyaasha Maalgeliyeen

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa sanadkan baaris maaliyadeed oo  guul ku soo dhammaatay ku fuliyay labo iyo labaatan mashruuc oo ka mid lix iyo labaatanmashruuc oo horay loo qorsheeyay, kuwaas oo ka mid ah mashaariicda uu maalgeliyay Bankiga  Adduunka. Baaritaannadan ayaa loo fuliyay si waafaqsan Hagaha-Qoran ee Baarista Maaliyadda ee XHG ee JFS, waxaana loo xil-saaray shirkado baaris oo heer caalami ah, si loo hubiyo in la raacay Hab-raacyada Caalamiga ah ee Xisaabinta (ISSAs), shuruucda gudaha, heshiisyada deeq-bixiyeyaasha iyo hab-raacyada ugu habboon ee la isku raacsan yahay.

Iyada oo loo kuurgalayo dhaqdhaqaaqa maaliyadeed iyo hannaanka fulinta, baarista waxay bixisay tilmaamo mug leh oo ku saabsan heerka hufnaan ee maareynta lacagaha deeqaha ah, waxaana XHG uu ka bixiyay talooyin wax-ku-ool ah oo lagu horumarinayo. Dadaalkan, waxa uu XHG-JFS ku xaqiijinayaa madax-bannanida, iyo daahfurnaanta, iyada oo la xoojinayo sida dowladda Soomaaliya ay uga go'an tahay hufnaanta iyo isla-xisaabtanka iyo in si wax-ku ool-ah loo maareeyo deeqaha caalamiga.

# 4. HORUMARKA IYO NATIIJOOYINKA LAGA GAARAY YOOLASHA ISTARAATIJIYADEED

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku shaqeeyo qaab-dhismeedka Qorshaha Istiraatiijiga ah ee 2023–2027, kaas oo lagu ansixiyay kadib falanqeyn qoto dheer oo lagu sameeyay baahiyaha hay'adda iyo hortabinnada mudnaanta leh. Qorshaha istiraatiijiga ah ee 2023-2027 waxa uu si cad u faahfaahinayaa hawlaha-shaqo ee lagama maarmaanka u ah fulinta waajibaadka hay'adda. Hawlahan-shaqo ayaa lagu qaabeeyay talada hoggaanka sare ee XHG oo lagu kaabay aragtiyo iyo jawaab-celinno ay uga qeyb qaateen shaqaalaha waaxyaha kala duwan ee hay'adda.

Qorshaha istiraatiijiga ah ee 2023-2027 ayaa ku qotoma toddoba yool oo waaweyn oo istaraatiiji ah, kuwaas oo kala ah:

i. **YOOLKA 1AAD:** Dhijitaaleynta hannaanka hantidhowrista iyo horumarinta habab hantidhowr oo cusub, si Xafiisku awood ugu yeesho soosaarista warbixinno ku habboon, waqtiyeysan lehna tayo sare
ii. **YOOLKA 2AAD:** Hirgelinta maamul wanaagsan, oo leh hoggaan iyo anshax adag, si loo xoojiyo wax-ku-oolnimada iyo waxtarka XHGS
iii. **YOOLKA 3AAD:** Abuuridda xiriir firfircoon iyo iskaashi ku dhisan kalsooni oo lala yeesho daneeyeyaasha.
iv. **YOOLKA 4AAD:** Howlgelinta kaadir aqoon iyo xirfad sare leh, si loo helo hay'ad loo dhan yahay oo sameyneysa horumar joogto ah.
v. **YOOLKA 5AAD:** Xoojinta dhijitaaleynta iyo adeegyada taageerada si loo xaqiijiyo Waxtarnimada XHGS.
vi. **YOOLKA 6AAD:** Hubinta Madax-bannaanida, helidda Khayraad ku filan iyo xaqiijinta taageerada hormarka karaanka XHGS.
vii. **YOOLKA 7AAD:** Adkeynta xiriirka iyo wadashaqeynta XHGS la leeyahay Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDFS.

Warbixinta Waxqabadka Sanadlaha ah ee 2024 waxa ay si dhammeystiran uga warbixinaysaa horumarka laga gaaray hawlaha qabsoomay ee yoolasha istaraatiijiga ah intii lagu jiray muddadan. Yool kasta waxaa uu leeyahay hawlo sanadeed, kuwaas oo lagu qiimeeyo iyada oo loo fiirinayo qorshe-hawleedka xafiiska, sidoo kale intii uu socday qiimeyta waxqabadka sanadka 2024 Yool kasta waa la qiimeeyay iyada oo la adeegsanayo tilmaamo gaar ah, kuwaas oo si weyn u waafaqsan Qaab-dhismeedka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrista Sare "SAI PMF". Natiijooyinkan waxaa lagu gaaray hab-raacyo is-qiimeyn ah oo ay fududeeyeen aalado kala duwan, sida S-SEAT (Somali SAI Enhancement Audit Tools) iyo hab-raacyada hubineed ee tayada gudaha xafiiska.

## 4.1. YOOLKA 1AAD: Dhijitaaleynta hannaanka hantidhowrista iyo horumarinta habab hantidhowr oo cusub, si Xafiisku awood ugu yeesho soosaarista warbixinno ku habboon, waqtiyeysan lehna tayo sare

Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa ka go'an in uu xoojiyo tayada warbixinada baarista iyada oo la hagaajinayo hab-raaca baarista gudaha iyo ku-dhaqanka Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare, si loo gaaro yoolkan, XHG waxa uu diyaariyay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka oo looga golleeyahay in lagu caddeeyo qorshaha noocyada baaritaan ee la filayo in fuliyo muddada sanadka ah. Fulinta baaritaannadan ayaa loo adeegsadaa Hageyaal qoran oo xafiiska u gaar ah oo ku jaan-go'an Halbeegyada.

Baarista maaliyadeed ayaa hiigsanaysa hubinta xisaab-xirka maaliyadeed ee DFS in uu si sax ah u muujiyo xaaladda dhaqaale ee dowladda. Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga ayaa loogu kuurgalaa heerka u hoggaansanaanta shuruucda iyo xeerarka khuseeya maareynta maaliyadda ee hay'adaha dowladda sida Wasaaradaha, Waaxaha, iyo Wakaaladaha, halka Baarista Gaarka ahna ay muhiim u tahay u kuurgalka khataraha gaarka ah, si loo helo isla-xisaabtan adag iyo hufnaan qiima leh. Intaas waxaa dheer, Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit) waxa ay qiimeysaa waxtarka nidaamyada macluumaadka, hubinta IT-ga; halka Baarista Fatashka ay tahay mid loogu kuurgalo ku-takrifalka, musuqa iyo lunsashada hantida ummadda, taas oo inta badan ku soo dhammaata tallaabo sharci oo hay'adaha sharciga ay ka qaadaan ciddi lagu helo.

Iyada oo ay jiraan caqabado ku xeeran waxqabadka dowladda oo ku hor gudban gaarista Yoolalka Horumarka Waara (SDGs) iyo hagaajinta bixinta adeegyada, Baarista Waxqabadka waxa ay muhiim u tahay in lagu ogaado in siyaasadaha iyo barnaamijyada dowladda loo hirgaliyay si wax-ku-ool ah. Intii lagu jiray diyaarinta qorshaha istiraatiijiga ah, XHG waxa uu diiradda saaray in uu xoojiyo karaankiisa si uu u soo saaro warbixin khuseysa baarista waxqabadka hay'adaha dowladda. Sidoo kale, xoojinta taya-dhowrka (quality-control) iyo tayo-hubinta (quality-assurance) ayaa mudnaan gaar ah leh, iyada oo la hubsanayo in heerarka tayada ay si qoto dheer uga dhex-muuqdaan hab-raacyada baarista.

***Shaxda 1[aad]: Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 1[aad]***

| Ujeeddo | Heerka Horumarka ee Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Qorsheynta iyo kormeerka baarista guud iyada oo lagu salaynayo qiim-eynta khatara-ha iyo arrimaha xasaasiga ah | • Sanadka 2024, Hantidhowraha Guud waxa uu ansixiay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka (AOAP), waxaana lala wadaagay maamulka.<br>• Kormeer joogto ah iyo tallaabooyin daba-gal ah ayaa la sameeyay si loo xaqiijiyo hirgelinta Qorshaha Baarista.<br>• Waxaa la qabtay aqoon-isweydaarsi wadareed ah si loo soo gunaanado qorshaha guud ee baarista sanadka 2024.<br>• XHG ayaa diyaariyay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka 2025. | • Xafiiska ayaa saxiixaya Qor-shaha Guud ee hirgelinta Baarista Sanadka 2025. |
| Soo saarista warbixinna-da baarista maaliyadeed oo tayo sare leh oo wakhtiyeysan | • Warbixinnada Baarista Maaliyadeed waxaa loo gudbiyay Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Baarlamaanka (GMM), iyada oo nuqullo loo kala diray xafiisyada Madax-tooyadda iyo Ra'iisul Wasaaraha. Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Baarlamaanka ayaa la siiyay 30 maalmood oo dib-u-eegis ah ka hor inta aan warbixinta si rasim ah loo shaacin, sida uu dhigayo Sharciga maareynta Maali-yadda Guud (Sharciga No. 17, 2019).<br>• Waxaa qabsoomay tababar khuseeysa Baarista Maa-liyadda intii lagu jiray baarista maaliyadeed ee 2024 (xisaab-xirka sanadka 2023).<br>• Warqadaha shaqada ee baarista maaliyadeed ayaa dib uga dhacdey in la geliyo nidaam ka S-SEAT si loogu sa-meeyo tayo hubin gudaha ah intii lagu guda jiray shaqada baarista.<br>• Waxaa qaar ka mid ah shaqaalaha baarista loo xulay tababar lagu kobcinayo xirfadooda ku aaddan habaha baarista maaliyadeed, ayna ku helayaann Shahaadada PESA-P.<br>• Waxaa qabsoomay baarista mashaariicda ay Deeq-bix-iyeyaasha maalgeliyaan, iyada oo loo idmaday khubaro bannaanka ah. | • Siyaasadda XHG ee hawldaadajin-ta (outsourcing policy) ayaa loo dib dhigay sanadka 2025 |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka ee Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Hirgelinta baaris u-hoggaansanaan oo awood u leh in waqti go'an lagu fuliyo baaris tayo sare leh oo taabanaysa arrimo badan oo muhim ah | • Waxaa 19 hay'adood lagu sameeyay baarista u-hoggaansanaata sharciga, iyada oo loo raacayo Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka (QGBS) ee ku xusan Hagaha qoran ee Baarista U-oggaansanaanta Sharciga ee XHG-JFS. Waxaa sidoo kale si nidaamsan loo soo bandhigay natiijooyinka baarista, iyada oo la raaciyay cilladihii iyo talooyinkii dhammaan baarisyadii u-hoggaansanaata sharciga ee sanadihii hore, ayna la socoto natiijada baarstii la daabacay.<br>• Warqadaha shaqada maaliyadeed ayaa la geliyay nidaamka S-SEAT si loogu sameeyo tayohubin gudaha ah intii lagu guda jiray shaqada baarista., iyada oo la raacayo farriimaha maamulka sare.<br>• Waxaa shaqaalaha baarista u-hoggaansanaanta sharciga qaarkood loo xulay tababar lagu kobcinayo xirfaddooda oo ku saabsan baarista u-hoggaansanaanta sharciga, ayna qaarkood ku heleen Shahaadada PESA-P.<br>• Waxa aan wali qabsoomin tababar khuseeya baarista u-hoggaansanaanta sharciga oo la qorsheeyay in ay bixiso Hay'ad Hantidhowr Sare oo khibrad leh (SAI).<br>• Hawsha dabagalka hantida maguurtada ah oo lagu qiimeynayo xaaladda iyo isticmaalka si loo hubiyo in loo maareeyay si hufan, loogana hortago khasaaraha ama ku-takrifalka ayaan wali la dhammeystirin. | • Tababar khuseeya Baarista U-oggaansanaanta Sharciga oo ay bixin lahayd Hay'ad Hantidhowr Sare oo khibrad leh (SAIs) lama fulin sanadkan, balse waxaa la filayaa in ay qabsoonto sanadka soo socda.<br>• Diyaarinta hab-raaca nidaamka dabagalka hantida maguurtada ah, ayaa wali socota, waxaana la filayaa in la dhammeystiro sanadka soo socda |
| Hirgelinta baaris xooggan ee oo Nidaamyada Macluumaadkah (IS audit) oo awood u leh in ay soo saarto warbixinno tayo sare leh oo ku saabsan nidaamyada IT-ga ee dowladda | • Waxaa la dhammeystiray Nuqulka Hagaha qoran ee u gaarka ah Baarista Nidaamyada macluumaadka (IS audit).<br>• XHG waxa uu sidii loogu tala galay u fuliyay baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit ) sida ku cad qorshaha guud ee Baarista, iyada oo warbixinta baarista lala wadaagay hay'adaha ay khuseyso.<br>• Shaqada xooggan oo Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit ) ayaa lagu aasaasay gudaha XHG.<br>• Shaqaaleysiinta ugu yaraan shan baareyaal ku takhasusay Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit) wali lama hirgelin.<br>• Tababarka iyo Horumarinta xirfadda shaqaalaha Unugga Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit) wali lama fulin. | • Dhammeystirka iyo ansixinta Hagaha qoran ee Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit manual) ayaa noqon doonta Sanadka 2025.<br>• Tababarka iyo Horumarinta xirfadda shaqaalaha Unugga Baarista Nidaamyada Macluumaadka (IS audit) ayaa noqon doonta Sanadka 2025<br>• Shaqaaleysiinta Baareyaal Nidaamka Macluumaadka (IS Audit) waxa ay ku xirantahay in loo helo miisaaniyad. |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka ee Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| In la hirgeliyo baaris xoogan oo la xiriirta Fatashka (Forensic Audit). | • XHG waxa uu fuliyay Baaris Fatash ah, waxaana warbixinta baarista lala wadaagay hay'adaha ay khuseyso.<br>• Qorista Hagaha qoran ee Baarista Fatashka wuu socdaa, waxaana la dhammeystirayaa2025.<br>• Labo ka mid ah maamulka waaxda ayaa billaabay barnaamijka Xirfadda Baarista Fatashka (CFE); mid ka mid ah ayaa shahaadada helay, halka kan kale la filayo in uu qaato bisha Febraayo 2025.<br>• Si guul leh ayaa loo fuliyay baaritaan gaar ah oo lagu sameeyay saddex safaaradood, warbixintana waa la sii daayay.<br>• Baaritaan gaar ah ayaa lagu sameeyay afar ka mid ah Hay'adaha dowladda, warbixinta baarista saddex ka mid ah waa la sii daayay, halka warbixinta 4aad ay ku jirto marxaladda dib-u-eegista. | • Caqabado dhaqaale awgood, waxaa sanadka 2025 loo dib dhigay dhismaha sheybaarka<br>• danabeysan iyo qabashada tababarka sanadlaha ah ee Baarista Fatashka.<br>• Waqtiga cusub ee loo qabtay in lagu hirgeliyo Hagaha oran ee Baarista Fatashka ayaa loo dib dhigay dhammaadka January 2025.<br>• Warbixintii 4aad ayaa la sii dayndoonaa billowga sanadka 2025 |
| In la hirgeliyo baaris xoogan oo la xiriirta waxqabadka ( Performance audit) | • XHG ayaa fuliyay 2 tijaabo oo baarista waxqabadka ah (2-pilot performance) kuwaas oo loogu sameeyay mashaariic cayiman.<br>• Waxaa la diyaariyay Nuqulka Hagaha qoran ee Baarista Waxqabadka XHG oo ku qotama Hagaha qoran ee Baarista Waxqabadka AFROSAI-E<br>• Tababarka iyo horumarinta xirfadda shaqaalaha qaar ee Waaxda Baarista Waxqabadka ayaa la fuliyay.<br>• Baarista Waxqabadka ee la qorsheeyay in lagu sameeyo qeybaha garsoorka ee maxkamadaha madaniga ah ayaa dib loo dhigay, laguna beddelay hawlo kale.<br>• Waxaa XHG hirgeliyay tababar sanadle ah oo ku saabsan mowduucyo cayiman oo la xiriira waxqabadka dowladda Soomaaliya iyo habka loo fuliyay Baarista Waxqabadka.<br>• Waxaa si joogta ah u qabsoomi doono Horumarinta xirfadda oo ay fududeynayaan dalladaha gobolka ee baarayaasha waxqabadka hay'adaha kale (SAI). | • Hagaha-Qoran ee Baarista Waxqabadka ayaa la ansixin doonaa sanadka 2025.<br>• Hagaha qoran ee Baarista Waxqabadka waxaa la ansixin doonaa 2025.<br>• Baarista Waxqabad ee la qorsheeyay in lagu sameeyo Maamulka Xabsiyada ayaa qabsoomi doonto sanadka 2025. |



Hantidhowraha Guud oo saxiixay Qorshaha guud ee Baarista - 2023



Hantidhowraha Guud oo soo gabagabeeyay tababar-ka baarista Fatasha. Muqdisho-Soomaaliya




Tababar la xariira Canshuuraha oo lagu qabtay Howlka weyn ee XHG



Tababarka Hubinta Tayada oo ka dhacay xarunta AFROSAI-E, South Africa.

| Ujeeddo | Heerka Horumarka ee Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| In si adag loo hubiyo tayada baarista, lana helo maamul toosan, iyo in la sameeyo dib-u-eegista hab-raacyada baarista | • Nidaamka S-SEAT ayaa si sax ah loogu habeeyay warqadaha lagu shaqeeyo (working papers) si loo xakameeyo tayada dhammaan shaqada baarista, waxaana la adeegsaday liiska taya-dhowrka ee ee hannaanka U-hoggaansanaata Sharciga. | • Hab-raaca hubinta tayada ee dhinacyada kale ee baarista ayaa lagu dari doonaa nidaamka S-SEAT Sanadaha soo socda ee Qorshaha Istaraatiijiyadda. |
| Tayo-hubin madax-bannaan oo sanadle ah oo loogu sameynayo baaritaannada qaar, si looga korarsado aqoon iyo garaad | • Dib-u-eegis tayo-hubin sanadle ah ayaa lagu sameeyay qaar ka mid ah baarista U-hoggaansanaanta Sharciga iyo Baarista Maaliyadda si loo hubiyo in la waafajiyay hal-beegyada baarista.<br>• Waxaa Hantidhowraha Guud loo gudbiyay in wax laga qabtay cilladihi ka soo baxay tayo-hubinta lagu sameeyay qaar ka mid ah baarista sanadlaha ah.<br>• AFROSAI-E ayaa si madax-bannaan u sameesay dib-u-eegis taya-hubinta Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.<br>• Waxaa qabsoomay tababar la xiriira Hubinta Tayada (QA) oo loogu talagalay shaqaalaha qaar, laakiin waxaa sanadka soo socdo loo dib dhigay shaqaaleysiin muddo dheer oo lataliye dhanka Hubinta Tayada ah. | • Dib-u-eegista siyaasadaha waaxyaha kale ee XHG si loo xaqiijiyo tayada ayaa la fulin doonaa sanadka 2025. |

## 4.2. YOOLKA 2AAD: Hirgelinta maamul wanaagsan, oo leh hoggaan iyo anshax adag, si loo xoojiyo wax-ku-oolnimada iyo waxtarka XHGS

Hirgelinta qaab-dhismeed maamul adag oo leh hoggaan iyo heer anshaxa wax-ku-ool ah ayaa tiir u ah in XHG uu xoojiyo daacadnimada iyo isla-xisaabtanka, taas oo wax ka tareysa tayada, kalsoonida, hufnaanta, iyo isla-xisaabtanka hay'adda gudaheeda. Dadaalkan waxaa lagu xaqiijinayaa in XHG uu uguto waajibaadkiisa si hufan oo daahfuran, iyada oo xoojinaysa sumcadda iyo kalsoonida ay daneeyeyaasha ku qabaan xafiiska. Si loo hubiyo tayada waxqabadka iyo maareynta isbeddellada xirfadeed, XHG waxa uu samaynayaa falanqeyn joogto ah iyo la qabsiga caqabadaha cusub.

Habkan ayaa sahlaya in XHG uu si wax-ku-ool ah u maareyo isbeddellada ka dhex dhacaya hay'adda, taas oo dhaxalsiinaysa natiijooyin qurxan, iyo himillada oo la gaaro. Horumarinta xirfadda iyo maareynta waxqabadka XHG ku sii haysan karaa dhaqanka wacan, kuna xoojin karaa howlihiisa shaqo. maareynta tayada iyo xakameynta gudaha ayaa dowr muhiim ah ku leh adkaynta isku halleynta baarista XHG, taas

oo lagu dabagalayo in dhammaan hawlaha baarista ay waafaqsan yihiin heerarka xirfadeed iyo hab-raacyada ugu wanaagsan. Tabaha soo socda ayaa xoojinaya isku halaynta natiijada ka soo baxda baarista iyo kalsoonida guud ee uu XHG u leeyahay daneeyeyaasha, iyada oo diiradda la saarayo hubinta tayada iyo xakameynta gudaha ayaa xoojinaysa heerka XHG oo ah hay'ad baaris oo lagu kalsoonaan karo.

**Guullaha kale ee laga gaaray yoolka 2aad waxaa ka mid ah:**

i. Isoo saarista warbixinnada horumarineed (saddex-bilood iyo lix-bilood-ba mar) iyo warbixinta waxqabadka sanadlaha ah
ii. Dib-u-eegista I qorshe hawleedka iyo warbixinta lix-biloodlaha ah, laguna soo bandhigo natiijooyinka iyo isbeddellada.
iii. Diyaarinta qabyo-qoraalka siyaasadda maareynta khataraha ee XHG.
iv. Diyaarinta qabyo-qoraalka qaab-dhismeedka xakameynta gudaha ee XHG, kaas oo waafaqsan maamulka tayada oo lagu xoojiyay qaab-xakameynta filas-hooyinka, mabaadi'da, mas'uuliyadaha, iyo shuruudaha tayada iyo xakameynta gudaha ee lagu tilmaamay qaab-dhismeedka (COSO).
v. sameynta jadwal-taariikheedka XHG si loo mideeyo dhammaan tababarrada iyo faahfaahinta munaasabadaha si loo suurageliyo waxtar mug leh.

***Shaxda 2aad: Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 2aad***

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 20233 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Xoojinta wax-qabad guud, iyo maareynta isbeddellada | • Waxaa la diyaariyay qabyo-qoraal hordhac ah ee siyaasadda maareynta khataraha ee XHG.<br>• Waxaa la sameeyay jadwal tijaabo ah oo loogu talagalay isku dubaridka dhacdooyinka iyo waxtarka XHG.<br>• Tababarkiii la qorsheyay ee istiraatiijiyadda, hawlgalka, iyo maareynta isbeddelka looguna talagalay saraakiisha sare ee XHG lama qaban, kaas oo qeyb ka ah Barnaamijka maareynta (MDP) II.<br>• Waxaa la dhammaystiray oo la faafiyay warbix-inta waxqabadka XHG ee 2023.<br>• Waxaa la soo saaray warbixinno saddex-bi-lood ah iyo mid lix-bilood ah si loo sameeyo dabagalka gudaha .<br>• Waxaa dib loo eegay Qorshe Hawleedka XHG bartamihii 2024.<br>• Waxaa la diyaariyay qorshe howleedka 2025. | • Waxaa sanadka 2025 la dhammeystirayaa oo la hirgelinayaa siyaasadda maareynta khataraha ee XHG.<br>• Nidaam khuseeya qorshaha istaraatiijiyadda iyo hawgalka ayaa la filayaa in la hirgeliyo sanadka 2025.<br>• tababarka sanadlaha ah ee istiraatiijiga, Qorshe hawleed-ka, iyo maareynta isbeddelka waxaa loo qorsheeyay in la qabto 2025. |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 20233 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Dejinta qa-ab-dhismeed ballaaran oo khuseeya maareynta tayada iyo Hubinta gudaha ee XHG. | • Qaab-dhismeed baaxad leh oo loogu talagalay maareynta tayada iyo hubinta gudaha hay'adda wali lama dhammeystirin.<br>• Qaar ka mid ah siyaasadaha khuseeya haw-laha muhiimka ah ee XHG ayaa dib-u eegis lagu sameeyay , iyada oo la fiirinayo tayada iyo hubinta gudaha ee la hirgalay. | • Qabyo-qoraalka qaab-dhis-meedka hubinta gudaha oo la diyaariyay ayaa la hirgelinayaa 2025 |
| Kalsooni buuxda oo ka jirta Gudaha Xafiiska | • Waxaa dib loo eegay oo la cusboonaysiiyay Xeerka Anshaxa.<br>• lama adeegsan IntoSAINT si loo sameeyo warbixinta XHG ee ku aaddan ku dhaqankaee Xeerka Anshaxa. | • Sanadka 2025 ayuu XHG soo saari yaa warbixin ku saabsan sida XHG u dhaqangeliyay Xeerka Anshaxa iyada oo la adeegsanayo qiimeynta IntoSAINT. |

## 4.3. YOOLKA 3AAD: Abuuridda xiriir firfircoon iyo iskaashi ku dhisan kalsooni oo lala yeesho daneeyeyaasha

IXHG waxa uu mudnaanta siiyaa horumarinta xiriirka kala dhaxeeyo daneeyeyaasha iyada oo loo marayo hab furfuran, dhegaysi feejigan, iyo dadaal wada-shaqeyneed. Ballanqaadkan waxa uu xaqiijinayaa in dhammaan dhinacyada khuseeya ay helaan ka qeybgalin iyo xog-wadaag, ku qotoma jawi ku saleysan ixtiraam iyo iskaas-hi wadajir ah.

XHG waxa uu Baarlamaanka ka taageeraa kormeerka warbixinnada baarista, taas oo wax ka tareysa horumarinta, hufnaanta iyo isla-xisaabtanka qaab-dhismeedka dowlad wanaagga. Iyada oo si firfircooni ku dheehan tahay uu uga qeyb qaadanayo hannaankan, XHG waxa uu ka caawiyaa sare u qaadista hannaanka korjoogteynta hay'adaha dowladda, iyada oo la hubinayo in natiijada baarista ay tahay mid cad oo la fulin karo.

Intaa waxaa dheer, XHG waxaa ka go'an hagaajinta hab-raacyada baarista iyada oo la xoojinayo aragtiyo iyo tala-celin qiimo leh. Hay'addu, sidoo kale, waxa ay xoogga saartaa hagaajinta qaabka iyo hababka lagu gudbiyo warbixinta, si loo xaqiijiyo in daneeyeyaashu si buuxda u fahmaan xogta lala wadaagay.

Iyada oo loo marayo iskaashiga ururrada caalamiga ah, XHG waxa uu hiigsanayaa in uu xoojiyo xirafad ku shaqeynta iyo dhowrsanaanta ee hab-raaca xisaabin-ta iyo baarista gudaha Soomaaliya, waxa uuna sidaas oo kale, wax ka baranayaa waayo-aragnimada hay'adaha hantidhowrista Sareee gobolka iyo kuwa caalami-ga ah si loo dabaqo hab-raacyada ugu wanaagsan, loona horumariyo halbeegyada waxtarka iyo hufnaanta.

***Shaxda 3aad: Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 3aad***

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 20233 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Xoojinta awoodda Baarlamaanka si ay u lafa-guraan warbixin-nada baarista | • XHG ma siinin Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda (GMM) taageero farsamo ama caawin ku aaddan fahanka warbixin-nada baarista, balse, waxa uu diyaariyay qabyo-qoraal ku saabsan tilmaamaha, siyaasadaha, iyo hab-raacyada ay ku wada xiriirayaan Baarlamaanka.<br>• Waxaa dib-u-dhac ku yimid qabashada aqoon-is-waydaarsiyada baraarujinta Baarlamaanka ee ku saabsanaa dowrka XHG iyo hawlaha baarista oo ay kamid yihiin habaha-cusub ee baarista waxqabadka iyo Fatashka (performance and forensic audits), u kuurgelidda iyo dabagalka baarista. | • XHG waxaa u qor-sheysan in Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda (GMM) uu siiyo talooyin farsamo oo ku saabsan laf-agurka warbixinnada baarista, uuna ansixi-yo hab-raacayada xi-riirka Baarlamaanka, iyo sido kale qabasha-da aqoon-is-waydaar-siyada baraarujinta ah. |
| Xiriirka iyo taageera-da wax ku ool ka ah Daneeyayaasha (Stakeholders) | • XHG waxa uu diyaariyay qabyo-qoraal qe-exaya hab fudud oo lagu la xiriiro Daneey-eyaasha oo ku dhisan ka baaraandegid iyo mudnaan siin.<br>• XHG waxa uu diyaariyay warsideyaal iyo ma-qaallo si loo muujiyo horumarka muhiimka ah iyo waayo-aragnimada.<br>• Waxaa la hirgeliyay siyaasadda isgaarsiinta XHG, si waafaqsan Sharciga XHG iyo Qor-shaha Istiraatiijiga ah.<br>• XHG waxa uu aqoon-is-waydaarsi sana-dle ah u qabtay Hay'adaha kala duwan ee dowladd (MDAs), iyada oo lala wadaagay milicsiga guud iyo fahamka khaladaadka baarista.<br>• Waxaa wacyigelin ku saabsan dowrka XHG iyo fasiraadda warbixinnada baarista loo sameeyay warbaahinta.<br>• Waxa aan wali tallaabo loo qaadin dhanka wada-shaqeynta tooska ah ee bulshada ray-idka iyo dadweynaha si loo muujiyo dowrka iyo muhiimadda XHG, sida shirarka iskaas-hatooyinka ama goleyaasha deegaanka.<br>• XHG waxa uu soo saaray muuqaal kor u qaadaya hay'adda oo muujinaya guulaha xafiiska.<br>• XHG waxa uu goob-joog ka ahaa xafladaha xil-wareejinta Hay'adaha dowladda.<br>• Waxa aan wali qabasoomin kulamo sanadle ah ee lagu gorfeeyo dowlad wanaagga.<br>• XHG waxa uu diyaariyay hab-raacyo la xiriira xil-wareejinta. | • XHG waxaa u qor-sheysan in uu qabto munaasabad sanadle ah oo ku saabsan dowlad wanaagga la-guna muujinayo dow-rka iyo muhiimadda XHG ee ku aaddan maamulka maali-yadda Soomaaliya, rubuca saddexaad ee 2025.<br>• Qabyo qoraalka la diyaariyay ayaa hadda laga la tashanayaa bahwadaagta (AFRO-SAI-E) waxaana la dhammeystirayaas-anadka 2025.<br>• Wada-shaqayn la la yeesho muwaadini-inta iyo ururrada bulshada rayidka ah ayaa la hirgelinayaas-anadka 2025. |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 20233 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Horumar joogto ah oo ku aaddan hannaanka warbixinnada iyo la wadaagista warbaa-hinta. | • XHG waxa uu qabtaa shir jaraa'id kadib marka warbixinnada la soo saaro.<br>• Ma jiro hage qoran oo ku saabsan hab qoraalka warbixinnada.<br>• Waxaa la abuuray qaab lagula xiriiro mu-waadiniinta, si ay ula wadaagaan talooyin iyo aragtiyo ku saabsan baarista. | • XHG waxa uu sanadka 2025 qorsheynayaa in uu soo saaro tilmaa-mo la xiriira diyaarinta warbixinnadaa |
| Ka qeyb-qaadashada kor u qaadista xirfa-daha xisaabinta iyo baarista ee Soomaa-liya. | • Waxaa la sameeyay dadaallado loogu olo-leynayo in la helo qaab-dhismeed sharci oo lagu dhiso hay'ad xisaabeed eeSoomaaliya | |
| Wax ku biirinta iyo ka barashada isbahey-siyada caalamiga ah ee Hay'adaha Han-tidhowrista Sare iyo hay'adaha kormeerka | • Maamulka XHG waxa uu ka qeyb galay shirar iyo doodo heer gobol iyo heer caalami ah, kuwaas oo khuseeya shaqada XHG | |



Aqoon-is-weydaarsi loo qabtay xirfadlayaasha warbaahinta oo ku saabsan fahamka iyo ka warbixinta natiijooyinka warbixinta baarista ee XHG



Aqoon-is-weydaarsi loo qabtay xirfadlayaasha warbaahinta oo ku saabsan fahamka iyo ka warbixinta natiijooyinka warbixinta baarista ee XHG


Kulan dhex maray Wasaaradda maaliyadda iyo XHG ee ka dhacay - Mogadishu, Soomaaliya


Munaasabad la soo agaasimay oo lagu muujinayay dulmarka khaladaadka lagu ogaaday Baarista XHG

## 4.4. YOOLKA 4AAD: Howlgelinta kaadir aqoon iyo xirfad sare leh, si loo helo hay'ad loo dhan yahay oo sameysneysa horumar joogto ah

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxaa ka go'an in uu hormuud u noqdo dadaallada lagu horumarinayo dowladnimada iyo isla-xisaabtanka heer qaran iyo mid gobol. Iyada oo xoogga la saarayo shaqaalaysiin dhab ah, tababarada, iyo daryeelka shaqaalaha. Ujeeddadka XHG waa in uu soo saaro shaqaale xirfad leh, dhiifoon oo awood u leh in ay baaraan oo qiimeeyaan hay'adaha dowladda. Habkan waxa uu muhiim u yahay in hay'adaha la la xisaabtamo, lana hubiyo in ay u shaqeeyaan si hufan oo daahfuran.

Istaraatiijiyadda lagu maamulayo Shaqaalaha ee XHG ayaa la filayaa in ay xoojiso heerka qanacsanaanta shaqaalaha iyo hawl-qabadkooda, taas oo dhanka kalena kordhinaysa wax-soo-saarka, isla markaana wax ka tareysa dowlad wanaagga. Kobcinta shaqaalaha ayaa waxa ay muhiim u tahay in XHG uu gaaro himilooyinka iyo yoolasha istiraatiijiga ah. Tababarada joogtada ah iyo horumarinta xirfadda shaqaalaha qeybihiisa kala duwan ayaa muhiim u ah in la siiyo xirfadaha iyo aqoonta lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka, taas oo ugu dambeyntiina faa'iido u ah shaqaalaha, una dhaweynaysa himilada hay'adda.

Si loo xoojiyo xiriirka iyo xog-siinta daneeyeyaasha caalamiga ah, XHG waxa uu dhiirrigeliyaa is-dhexgal furan oo la la yeesho bahwadaagta caalamiga ah. Hay'addu waxa ay sidoo kale fududenaysaa in la helo ujeeddooyin dhammeystiran iyada oo soo saaraysa dukumentiyada muhiimka ah iyo warbixinnada oo ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriisiga. XHG waxa uu diyaariyay qabyo-qoraal tilmaan ka bixinaya xirfadda shaqaalaha baarista. Waxaa intaa dheer, waxaa qabsoomay tababaro lagu qabtay gudaha xarunta iyo barnaamij xirfadeedyo lagu qaadanayo shahaadooyin sida Pesa-p iyo CFE, waxaa intaa garab socday qorsheyaal loogu talagalay horumarinta xirfadda shaqaalaha ku hawlan barnaamijyada shahaadooyinka.

***Shaxda 4aad: Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 4aad***

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Hay'ad awood buuxda u leh in ay gudato waajibaadka horyaalla | • XHG waxa uu hubiyaa in shaqaalaha ay ka warqabaan, kuna lug yeeshaan isbeddelada hay'adda, XHG waxa uu shaqaalaha u qabtay kulamo hawleed joogto ah.<br>• Waxaa si rasmi ah loo shaqaaleysiiyay Lataliye Sare oo khabiir ku ah maareynta Shaqada. | |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Maamul adag oo maareyn kara shaqaalaha XHG | • XHG waxa uu maareeyay hirgelinta guud ee siyaasadda Shaqaalaha.<br>• XHG waxa uu diyaariyay qabyo-qoraalka dhammaan qeexidda shaqooyinka xafiiska.<br>• Dib-u-eegis ku saabsan qeexidda shaqooyinka ayaa la bilaabiyaa waxaana la dhammaystiriyaa mustaqbalka dhow.<br>• XHG wali ma uusan fulin dib-u-eegis ku saabsan hirgelinta nidaamka maareynta Shaqaalaha ee danabeysan "e-HRM", Nidaamka Macluumaadka Shaqaalaha (HRIS), iyo falanqaynta iyo cabbiraadda Shaqaalaha si loo aqoonsado meelaha ka dhimman nidaamka.<br>• Dib-u-dhac ayaa ku yimid horumarinta iyo hagaajinta hab xirfadeedka ee shaqaalaha XHG guud ahaan.<br>• Shaqaalaha XHG ayaa ka qeybgalay tababaradda gobolka ee ku haboon xafiiska oo ay fuliyeey AFROSAI-E ama hay'adaha kale ee Hantidhowarista .<br>• XHG ma fulin hubinta joogtada ah ee bedqabka shaqaalaha, iyada oo la tixgelinayo halista shaqada xafiiska iyo inta la joogo goobta shaqada, mana uusan sameyn hab-raacyo iyo siyaasado cusub oo lagu hagaajiyo. | • XHG ayaa sii wadaya horumarinta qabya-qoraalka ah ee xirfadaha shakhsiga ah ee shaqaalaha sanadka 2025.<br>• Hirgelinta nidaamyada shaqada iyo shaqaalaha ayaa dib loo dhigay illaa 2025 sababo la xiriira dhaqaalaha.<br>• Istaraatiijiyadda shaqada iyo shaqaalaha iyo siyaasadda tababarka ayaa la hirgelinayaa sanadka 2025.<br>• Hubinta joogtada ah ee bedqabka iyo qiimeynta khataraha xafiiska ayaa la qabanayayaa sanadka 2025. |
| In dhammaan shaqaalaha, xafiiska ay helaan tababar iyo horumarin xirfadeed | • XHG ayaa ka qeybgalay tababaro la xiriira shaqaalaha oo ay u qabteen AFROSAI-E<br>• XHG waxa uu diyaariyay barnaamij tababar gudaha ah si kor loogu qaado xirfadaha, aqoonta, iyo wax-soo-saarka shaqaalaha XHG.<br>• XHG waxa uu dhammeystiray qeexidda hawlaha muhiimka ah ee shaqaalaha iyada oo loo marayo qeexidda shaqooyinka.<br>• In shaqaalaha aan ku jirin baarista ay helaan fursadaha shahaadooyin iyo xirfad dhiska ayaa dib uga dhacay sababo la xiriira miisaaniyadda.<br>• XHG ma uusan dejin qorshe lagu horumarinayo xirfadda shakhsiga ah ee loogu talagalay shaqaalaha baarista.<br>• XHG ma uusan sameyn nidaam aqoon-wadaag gudaha ah oo shaqaalaha ayisku dhaafsan karaan casharrada iyo khibradaha laga bartay hawlaha shaqo.<br>• . | • Waxaa la filayaa in shaqaalaha aan ku jirin baarista ay helaan fursado ay ku helaan shahaado, kuna kobciyaan xirfadahooda sanadka soo socdo inta lagu guda jiro istaraatiijiyadda.<br>• Qorshe lagu horumarinayo xirfadda oo loogu talagalay dhammaan shaqaalaha baarista ayaa la fulinayaa sanadka 2025.<br>• Horumarinta nidaamka aqoon-wadaagga gudaha ah ayaa la hirgelinayaa sanadka 2025. |

## 4.5. YOOLKA 5AAD: Xoojinta dhijitaaleynta iyo adeegyada taageerada si loo xaqiijiyo Waxtarnimada XHGS

Si loo fududeeyo hab-raacyada shaqo, loona horumariyo hufnaanta guud, XHG waxa uu xoogga saarayaa isku-xirka aaladda tiknoolajiyadda iyo nidaamyada casriga ah. In danabeynta la la qabsado waxa ay Xafiiska u suurtagelinaysaa in uu hagaajiyo adeegyada kabka ah, iyo in uu si wax-ku-ool ah uga jawaabo baahiyaha isbedbeddelaya ee daneeyeyaasha, iyada oo la tixgelinayo awoodda kordhaysa ee tiknoolajiyadda. Isbeddelkan loogu guuraayo hababka danabeynta ayaa la filayaa in uu wax ka taro hawlgallada, uuna daboolo baahiyaha hadda taagan.

Hirgelinta barnaamijyo horumarsan (softwares) iyo adeegsiga S-SEAT waa istiraatiijiyad muhiim ah oo lagu xoojinayo waxtarka iyo tayada baarista. Barnaamijka S-SEAT waxa uu XHG u suurtagalinayaa in uu hagaajiyo saxnaanta warbixinta iyo dhowridda waqtiga, taas oo kor u qaadaysa tayada adeegyada xafiiska. Xalka danabeynta ah waxa uu sidoo kale wax ka tarayaa maamulka iyo lafaguridda xogta, taas oo horseedaysa in la gaari karo go'aanno quman oo gudaha hay'adda ah.

Waxaa kale oo aad muhiim u ah tayeynta xafiiska iyo agabkiisa si loo xoojiyo niyadda shaqaalaha iyo wax-soo-saarkooda. Markii la casriyeeyo dhinacyadan, XHG waxa uu yareyn karaa kharashaadka ku baxa dayactirka iyo hawlaha shaqo ee xafiiska muddada fog. Sidoo kale, xoojinta hab-raacyada maamulka iyo maaliyadda waxa ay wax ka tarayaan hawlaha shaqo, waxa ayna kor u qaadayaan hufnaanta, waxa ay sidoo kale hubinayaan u hoggaansanaanta hab-raacyada sharci. Isbeddelladan ayaa la isla qirsanyahay in ay kordhinayaan hufnaanta iyo waxtarka hay'adda, taas oo ugu dambeyn keeneysa in la helo waxqabad wanaagsan oo dhanka maaliyadda iyo is-la-xisaabtanka ah.

***Shaxda 5aad: Ujeeddooyinka geedi socodka yoolka 5aad***

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Danabeynta hab-raacyada baarista, xoojinta adeegsiga teknoolajiyadda si sare loogu qaado tayada iyo waxqabadka. | • XHG waxa uu dhisay waax ICT oo xoojisa Maamulka iyo Maareynta Tiknoolajiyadda Xafiiska.<br>• XHG wali ma uusan sameyn xiriiro xirfadeed iyo mid wada-shaqayn oo la la yeesho maamulka IT-ga ee hay'adaha kale ee hantidhowrka caalamka iyo hay'adaha kale ee qaranka ee ku habboon.<br>• XHG waxa uu qiimeyn ku ku sameeyay nidaamka S-SEAT ka si dib-u-habayn loogu sameeyo.<br>• XHG waxa uu billaabay diyaarinta barnaamij casri ah oo ku saleysan tiknoolajiyada daruuraha, si loogu maareeyo xogta iyo agabka danabeysan ee la isku hallayn karo.<br>• XHG waxa uu suurtageliyay kaabayaasha tiknoolajiyada ee dhammaan shaqaalaha oo ka kooban tirada ku filan ee kombiyuutarro iyo shabakad aagga gudaha (LAN).<br>• XHG waxa uu xaqiijiyay baahiyaha agabka software-ka iyo Nidaamka Maamulka Macluumaadka (MIS) ee dhammaan waaxyaha XHG wuuna hirgeliyay.<br>• XHG waxa uu diyaariyay uuna hirgeliyay Nidaamyo cusub ay ka mid yihiin: qeybta maareynta heshiisyada, qeybta rasiidka guud, waxaa dhimman qeybta HRM, qeybta maamulka iyo maaliyadda, iyo qeybta qorshaha hawlgalka.<br>• XHG waxa uu dib u dhigay hirgelinta nidaamka "Mobile Device Management (MDM)" oo loogu talagalay in lagu maamulo lana xakameeyo aaladaha mobilka sida taleefannada casriga ah, noocyada waaweyn (Tablets), iyo laptops. | • XHG waxa uu qorsheynayaa in uu horumariyo xiriir xirfadeed iyo mid wada shaqayn oo la la yeesho maareeyayaasha IT-ga ee hantidhowrada kale sanadka 2025.<br>• Hawshan waxa ay u dib dhicaysaa illaa iyo inta laga helayo dhaqaale ku filan.<br>• Nidaamka weyn ee ERP ayaa shaqeynaya iyada oo saddex module lagu daray: qeybta maareynta heshiisyada, qeybta diiwaangelinta rasiidka, iyo qeybta raadraaca baarista. qeybaha kale sida qeybta HR , qeybta qorsheynta, iyo qeybta maamulka & maaliyadda ayaa la fulin doonaa Sanadaha soo socdo<br>• Ku rakibista nidaamka Mobile Device Management (MDM) ayaa dib loo dhigay sababo la xiriira miisaaniyadda waxaana la filayaa in la fuliyo sanadka 2025. |
| Kordhinta dhismaha iyo qalabeynta ka xafiiska | • XHG waxaq uu ansixiyay oo uu fuliyay siyaasadda maamulka iyo maaliyadda, siyaasadda maaraynta hantida, wax-iibsiga.<br>• XHG waxa uu qalabeeyay xafiis dheeri ah oo loogu talagalay in ka badan 40 oo baarayaal ah.<br>• Xadidaad dhaqaale aawgeed XHG ma uusan qaban tababar lagu horumarinayo awoodda maamulka maaraynta hantida iyo maaliyadda.. | • Tababarka lagu kobcinayo awoodda kooxda maamulka iyo maaliyadda ee la xiriirta wax-iibsiga iyo maaliyadda ayaa la qorsheeyay 2024.<br>• Waxa la qorsheeyey sannadaha soo socda in la helo goob xafiiseed ku filan oo lagu kaydiyo dukumentiyada. |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Xoojinta Maamulka iyo Maaraynta Maaliyadeed ee XHG | • XHG waxa uu soo saaray warbixin maaliyadeed sannadle ah wuxuuna gudbiyay Xisaabiyaha Guud. | • Sannadka 2024, waxaa la filayaa in baaris hantidhowr oo dibadda ah lagu sameeyo Xafiiska. |

## 4.6. YOOLKA 6AAD: Hubinta Madax-bannaanida, helidda Khayraad ku filan iyo xaqiijinta taageerada hormarka karaanka XHGS

Si XHG u sameeyo baaris madaxbannaan, waxqabadkiisuna u wanaagsanaado waxaa muhiim ah in la helo qaab-dhismeed sharciyeysan oo casri ah. Qaab-dhismeedka sharciga cusub ee XHG-JFS waxaa udub dhexaad u ah Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo la meel-mariyay 2012kii, kaas oo xoojinaya muhiimadda ay leedahay in la dhiso Xafiis Hantidhowr Guud oo madax-bannaan, iyo sidoo kale Baaqa Mexico oo qeexaya mabaadi'da muhiimka ah ee madax-bannaanida Hay'adaha Hantidhowrista Sare. Waxa ay tani caddeyneysaa in ay jirto baahi loo qabo qaab-dhismeed adag oo ku qotoma sharci, madax-bannaani uu yeesho Xafiiska Hantidhowraha Guud, waajibaad ballaaran, awood uu ku heli karo xog walba, iyo kheyraad ku filan.

Sanadkii 2023, Sharciga XHG (Sharci Lr. 14) ayaa la ansixiyay, kaas oo soo kordhiyay qaab-dhismeed casri ah oo lagu xoojinayo madax-bannaanida iyo waxtarka XHG. Sharcigan waxa uu la jaanqaadayaa hab-raacyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah, isaga oo saarayaa XHG waajibaad ballaaran, siinayana madax-bannaani, iyo in uu helo kheyraadka lagama maarmaanka u ah. Sanadka 2024, dadaallada la bixiyay waxaa diiradda lagu saaray hirgelinta sharcigan, iyada oo la abuurayo xeer-hoosaadyo ku jaango'an, dib-u-eegidna lagu samaynayo siyaasadaha jira, iyo qorsheynta olole baraarujin iyo wacyigelin ah oo loo sameynayo shaqaalaha iyo daneeyeyaasha. Hawlaha kale ee hortanbinta leh waxaa ka mid ahaa iskaashiga la la yeeshay Wasaaradaha Maaliyadda iyo Shaqada si loo lafaguro loona hagaajiyo hab-raacyada miisaaniyadda iyo shaqaalaha. Ujeeddada laga leeyahay ayaa ah in hawlaha maalinlaha ah si hufan loogu jaangooyo sharcigan cusub, taas oo kor u qaadaysa maamul wanaagga, daahfurnaanta, iyo sla-xisaabtanka nidaamka guud ee maaliyadda ee Soomaaliya.

Helidda maalgelin iyo taageero farsamo oo ku filan ayaa lagama maarmaan ah si loogu guulaysto fulinta qorshaha istiraatiijiga ah. Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waa isha ugu muhiimsan ee maalgelinta, iyada oo taageero dheeraad ah laga helo bahwadaagta horumarinta. Si tayada baarista loo horumariyo, XHG waxa uu mudnaanta siiyaa in uu helo taageero farsamo. Xafiisku waxa uu si dhaw ula shaqeeyaa bahwadaagta horumarinta isaga oo ka helaya taageero qorsheysan oo dhina cwalba ah, taas oo XHG u dhigaysa tusaale muhiim ah oo caalami ah marka ay timaado hab-raacyada baarista.


***Shaxda 6aad: Ujeeddooyinka geedisocodka yoolka 6aad***

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Maalgelin ku filan iyo taageero farsamo uu helo XHG | • XHG waxa uu qabtay shirar wadajir ah oo uu la yeeshay dhammaan bahwadaagta, iyada oo taageerada ay bixiyaan lagu daray qorshaha hawlgalka iyo warbixinta sanadlaha ah ee XHG.<br>• XHG waxa uu qabtay shirar wadajir ah oo uu la yeeshay dhammaan bahwadaagta oo ku saabsan taageerada qorshaha hawlgalka iyo warbixinta Sanadlaha ee XHG.<br>• XHG waxa uu si guul leh u abaabulay taageero ka timid bahwadaagta horumarinta oo lagu daboolayo baahiyaha maaliyada ee aan ku jirin taageerada Dowladda Federaalka, iyo taageerada farsamo si loo horumariyo karaanka iyo tayada baarista.<br>• XHG ma uusan diyaarin qorshaha guud ee kheyraadka, kaas oo ka tarjumaya baahiyaha maaliyadeed ee XHG uga baahan yahay Dowladda iyo bahwadaagta horumarinta si loo fuliyo qorshaha istiraatiijiyadeed.<br>• Ma qabsoomin shirar la la yeelan lahaa Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Maaliyadda iyo Miisaaniyadda (GMM) oo lagu soo bandhigayay baahiyaha kheyraadka XHG ee sanadka 2024. | • Diyaarinta qorshaha guud ee kheyraadka xafiiska, iyo soo gudibinta baahida loo qabo hirgelinta qorshaha istaraatiijiyadda waxaa la sii wadayaa sanadka 2025<br>• Kulamada loo qorsheeyay Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Maaliyadda iyo Miisaaniyadda waxaa la fulinayaa sanadka 2025. |
| Sugidda Madax-bannaanida | • Waxaa wali socdo in siyaasadaha, tilmaamaha, iyo hab-raacyada XHG lagu jaangooyo Sharciga Cusub ee Baaritaanka.<br>• XHG waxa uu shaqaalaha xafiiska u qabatay wacyigelin iyo tababaro la xiriira isbeddelada uu keenay Sharciga Cusub ee XHG.<br>• Ma qabsoomin kulanka shaqo ee Wasaaradda Shaqada iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka si loo hubiyo wareejinta shaqaalaha, loona billabo habab cusub ee shaqaalaysiin ah, laguna qaato shaqaalaha cusub, laguna maareeyo shaqaalaha si waafaqsan sharciga cusub ee hantidhowrka.<br>• Ma qabsoomin kulankashaqo ee Wasaaradda Maaliyadda oo lagu unkayo habab cusub oo lagu diyaariyo hab-raaca miisaaniyadda si waafaqsan sharciga cusub ee hantidhowrka. | • Hawsha dib-u- eegista siyaasadaha, hagidda, iyo hab-raacyada muhiimka ah si loo waafajiyo Sharciga Hantidhowrka ayaa sii soconaysa sanadka 2025.<br>• Wada-shaqaynta la la sameeyo Wasaaradda Shaqada, Wasaaradda Maaliyadda, iyo Guddiga Qaranka Shaqaalaha Rayidka ee Dowlada ayaa la fulinayaa sanadka 2025. |

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Awood sharciyad xooggan leh oo XHG ku hubiyo in qanda-raasyada dowladdu galayso lagu sa-meeyay dib-u-eegis, lana diiwaangeliyay xilliga saxda ah. | • XHG waxa uu fuliyay falanqaynta Dastuurka Ku-meelgaarka ah si loo caddeeyo waajibaad-ka iyo masuuliyadda gaarka ah ee XHG uga aaddan Dastuurka rasmiga ah ee diyaarintiisu socoto, lana hubiyo waafajinta sharciga han-tidhowrka.<br>• XHG waxa uu qabtay cilmi-baaris isbarbard-hig ah oo ku saabsan hab-raacyada sharciga, maamulka, ama xisaabaadka ee caalamiga ah oo la xiriira su'aalaha iyo dhibaatada heysata dowladnimada soomaaliya.<br>• XHG waxa uu Wasaaradaha, Waaxyaha, iyo Wakaaladaha Dowliga ah siiyay la talin ku saabsan hab-raacyada sharciga, maamu-lka, iyo xisaabaadka, waxaana la hirgeliyay nidaamyada talo-bixinta wadajirka ah.<br>• XHG waxa uu hawlgeliyay, uuna danabeeyay unugga keydka ee waaxda sharciga | |



Daah furayka Aqoon is weydaarsiga fahamka sharciga cusub ee XHG ayaa lagu qabtay Muqdisho, Soomaaliya




Hantidhowraha Guud oo shir gudoomiyey laba kulan oo ay ka soo qayb galeen deeq bixiyayaasha iyo daneeyayaasha XHG

## 4.7. YOOLKA 7AAD: Adkeynta xiriirka iyo Wadashaqeynta XHG la leeyahay Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDFS

Wada-shaqeyn iyo xiriir dhab ah oo dhexmara XHG-JFS iyo xafiisyada hantidhowrka Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa muhiim u ah horumarinta hawlaha baarista. Shanta sano ee soo socota, XHG waxa uu hiigsanayaa in uu hirgeliyo hindiseyaal horumarineed oo waxtara si loo kaabo kobaca xafiisyada hantidhowrada ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah dowladda Federaalka, iyada oo xoogga la saarayo is-waafajinta hab-raacyada iyo aaladaha loo adeegsanayo baarista.

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee xiriirka iyo wada-shaqeynta waxaa ka mid ah qabashada kulamo heerkoodu sarreeyo oo joogta noqda si loo wadaago waayo-aragnimada iyo kobcinta karaanka shaqaalaha hantidhowrka. Kaabidda kobaca karaanka waxaa uu isugu jiridoonaa mowduucyo muhiim ah sida hab-raacyada baarista, aaladaha danabeysan, iyo wada-shaqeynta daneeyeyaasha, mowduucyadaas oo idil waxa ay dhammaantood waafaqi doonaan qaab-dhismeedka Halbeegyada Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare "ISSAI". Hindisahan waxa uu ujeedkiisu yahay xoojinta awoodda hay'adeed iyo karaanka shaqaalaha ee xafiisyada hantidhowrka DXDFS, taas oo ugu dambeyn hagaajinaysa hab-raacyada baarista iyo maamulka guud ee maaliyadda DXDFS.

XHG-JFS waxa uu horumar weyn ka sameyay kor u qaadista heerka wada-shaqeynta iyo horumarinta siyaasadaha ee kala dhaxeeya xafiisyada hantidhowrka dowlad-goboleedyada. Kulan muhiim ah oo dhexmaray hantidhowraha guud ee JFS iyo xafiisyada hantidhowrka ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ah DFS ayaa lagu go'aamiyay in la dhiso koox farsamo oo soo diyaarisa qaab-dhismeedka heshiiska wada-shaqeynta. Kulamo joogto ah ayaa la qorsheeyay si loo hagaajiyo qabyo-qoraal dhammeystiran oo saldhig u noqonaya wada-shaqeynta. Intaas waxaa dheer, XHG waxa uu si mug leh uga qeybqaatay xiriirka wada-shaqeynta ee ka dhexeysa Xafiisyada HG ee DXDFS, XHG-JFS, iyo Midowga Yurub "EU". Wada-shaqeyntan waxa ay wax weyn ka tareysaa geedisocodka dhismaha qaranka ee nidaamka federaalka Soomaaliya.

Iskaashigan ma aha keliya mid faa'iido u leh xafiisyada hantidhowrka, balse sidoo kale waxa uu dowr muhiim ah ka ciyaarayaa horumarinta dowladdnimada, xoojinta nidaamka federaalka ah ee Soomaaliya, iyo sidoo kale kor u qaadista hufnaanta iyo isla-xisaabtanka maamulka guud ee maaliyadda.

| Ujeeddo | Heerka Horumarka Dhammaadka 2023 | Faallooyinka 2024 |
|---|---|---|
| Hannaan ku dhisan iskaashi iyo waayo-arag-nimo is-dhaafsi u dhexeeya XHG iyo XHG-DXDFS | • XHG ayaa soo agaasimay kulan is-xog-wareysi ah oo uu heerkiisu sarreeyo oo dhexmaray Hantidhowrka Guud  iyo Madaxda XHG-DXDFS.<br>• Waxaa meel gaba-gabo ah maraya qabyo-qoraalkaHannaanka iskaashiga iyo tababarada ee u dhexeeya XHG iyo XHG-DXDFS.<br>• XHG waxa uu casuumay XHG-DXDFS in ay ka qeyb qaataan diyaarinta hannaanka iskaashiga iyo tababarada, si loo bayaamiyo dowrka mid walba iyo mabadi'da wada-shaqeynta iyo ka go'naanta.<br>• XHG waxa uu diyaariyay siyaasadda lagu dhisay taageerada XHG-DXDFS sida uu dhigayo hannaanka lagu heshiiyay.<br>• Waxa aan qabsoomin tababaranadle ah oo XHG qorsheeyay in uu u qabto XHG-DXDFS. | • Hannaanka Iskaashiga iyo Tababarada ee u dhexeeya XHG iyo XHG-DXDFS waa la di-yaariyay, waxaana la filayaa in lasoo gunaana-do lana hirgeliyo sanadka 2025 |
| Ka shaqeynta hab-raa-cyada baarista isleh, lana adeegsado hababka lagu bartay tababara-da iyo barnaamijyada kobcinta karaanka ee khuseeya meela gooni ah | • XHG waxa uu XHG-DXDFS ka caawiyay diyaarinta Hagaha qoran ee baaris-ta  xafiisyadooda.<br>• XHG waxa uu XHG-DXDFS u qabtay tababar ku saabsan qaababka baaris-ta.<br>• XHG ma uusan qaban tababar ku saabsan hagidda iyo isdhaafsi booqasho oo ah meelaha ay baahida ka jirto sida hab-raacyada baarista, isticmaalka qalabka danabeysan, maareynta istaraatiijyadda, awoodaha sharciga ah, iyo  iskaashiga daneeyeyaasha , iyada oo la wadaagayo taageerid laga helo AFROSAI-E iyo saaxiibada kale ee caalamiga ah.<br>• Ma suuragelin in XHG-DXDFS ay ka qeybgalaan baarista lagu sameynayo mashaariicda caalamiga ah ee ka socda DXDFS. | • Hawlaha aan wali la fulin dib ayaa loo dhigay sababo la xiriira miisaaniyad yari, waxaana lagu darayaa qorshaha howleedka 2025 |

## 4.8. QIIMAYNTA WAXQABADKA "SAI-PMF": YOOLASHA, TUSAHA, TIXRAACA, IYO NATIIJADA

Xafiiska waxa uu hirgeliyay qiimeyn gudaha ah oo ku saleysan SAI-PMF, si loo qiimeeyo waxqabadkiisa, loona ogaado meelaha u baahan in sare loo qaado. Tani waxa ay ka caawinaysaa in la sameeyo go'aan qaadasho ku saabsan hirgelinta qorsheyaasha mustaqbalka iyada oo la tixgelinayo fursadaha iyo caqabadaha jira. Qiimayntani waa qeyb ka mid ah istaraatiijiyadda xafiiska si loo kordhiyo wax-soo-saarka iyo tayeynta baarista.

Qeybtani waxa ay faahfaahinaysaa hiigsiga tilmaamaha SAI PMF ee yoolalka Xafiiska. Intaas waxaa dheer, qiimeyntan SAI PMF waxa ay taabagelineysaa aragtiyada dib-u-eegista istaraatiijiga ah ee la qorsheeyay in la sameeyo 2025.

| Yoolasha | Tusaha | Sida loo cabbirayo | bar-bilow (sannad) | Hiigsiga 2024 |
|---|---|---|---|---|
| **Yoolka 1aad:** Dhijitaaleynta hannaanka hantidhowrista iyo horumarinta habab hantidhowr oo cusub, si Xafiisku awood ugu yeesho soosaarista warbixinno ku habboon, waqtiyeysan lehna tayo sare. | • SAI-7: Qorshaha Baarista Guud | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 2 (2020) | 3 |
| | • SAI-10:Hannaanka Baarista Maaliyadeed | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 0 (2020) | 2 |
| | • SAI-16: Hannaanka Baarista U-hogaansanaanta Sharciga | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 4 (2020) | 4 |
| | • SAI-12: Halbeegyada Baarista Waxqabadka iyo Tayada Maamulka | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 0 (2020) | 2 |
| | • SAI-13: Hannaanka Baarista Waxqabadka | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 0 (2020) | 2 |
| | • SAI-5: Outsourced Audits | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 0 (2020) | 2 |
| **Yoolka 2aad:** Hirgelinta maamul wanaagsan, oo leh hoggaan iyo anshax adag, si loo xoojiyo wax-ku-oolnimada iyo waxtarka XHGS | • SAI-6 Hoggaaminta iyo Xiriirka Gudaha | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 2 (2020) | 3 |
| | • SAI-3: Wareegga Qorshaha Istiraatiijiyadeed | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 3 (2020) | 3 |
| | • SAI-4: Kor-joogteynta Deegaanka Hay'adda | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 1 (2020) | 3 |

| Yoolasha | Tusaha | Sida loo cabbirayo | bar-bilow (sannad) | Hiigsiga 2024 |
|---|---|---|---|---|
| **Yoolka 3aad:** Abuuridda xiriir firfircoon iyo iskaashi ku dhisan kalsooni oo lala yeesho daneeyeyaasha | • SAI-25: Xiriirka la la leeyahey Warbaahinta, Muwaadiniinta, iyo Ururada Bulshada Rayidka ah | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 3 (2020) | 3 |
| | • SAI-24 Xiriir la la yeesho Baarlamaanka, Fulinta, iyo Garsoorka | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 1 (2020) | 2 |
| **Yoolka 4aad:** Howlgelinta kaadir aqoon iyo xirfad sare leh, si loo helo hay'ad loo dhan yahay oo sameysneysa horumar joogto ah. | • SAI-22: Maamulka Shaqaalaha Hay'adda | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 1 (2020) | 2 |
| | • SAI-23: Horumarinta Xirfadeed iyo Tababarka | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 1 (2020) | 2 |
| **Yoolka 5aad:** Xoojinta dhijitaaleynta iyo adeegyada taageerada si loo xaqiijiyo Waxtarnimada XHGS. | • SAI-21:Maamuulka Maaliyadeed, Hantida, iyo Taageerada Adeegga | • Hannaanka Cabbir e Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 3 (2020) | 3 |
| **Yoolka 6aad:** Hubinta Madax-bannaanida, helidda Khayraad ku filan iyo xaqiijinta taageerada hormarka karaanka XHGS | • SAI-1 Madax-banaanida XHG | • Hannaanka Cabbir ee Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 2 (2020) | 3 |
| | • SAI-2 Waajibaadka XHG | • Hannaanka Cabbir e Waxqabadka Hay'adaha Hantidhowrka Guud | 3 (2020) | 3 |
| | • Tiradda hawl-wadeennada hantidhowrka ee si joogta ah looga shaqaaleysiiyey XHG | • Tiri lambarka shaqaalaha ee dhammaadka sanadka | 40 (2022) | |
| **Yoolka 7aad:** Adkeynta xiriirka iyo Wadashaqeynta XHG la leeyahay Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDFS. | • Tirada xirfadeed iyo taageerada sare u qaadidda karaanka hay'adeed (tababar, munaasabad, aqoon isweydaarsi, tababaro wada jir ah, IWM) ee la siiyey, loona fududeeyey XHG-DXDF inta lagu guda jiray sanadka. | • Tiri lambarka xirfadaha, iyo taageerada sare u qaadidda karaaanka hay'adeed (tababar, munaasabad, aqoon isweydaarsi, tababaro wada jir ah, IWM) ee la siiyey XHG-DXDF inta lagu guda jiray | 3 (2022) | 3 |

# 5. HORUMARINTA ISKAASHIGA CAALAMIGA AH IYO IS-DHAAFSIGA XIRFADAHA

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya XHG waxa uu horumar ballaaran ka sameeyay iskaashiga caalamiga ah iyo xiriirada wada-shaqeynta, taas oo sare u qaaday xirfadaha baarista iyo waxtarka guud ee xafiiska. Wada-shaqeynta la la yeeshay hay'ado sida AFROSAI-E, IDI, Bankiga Adduunka, iyo Midowga Yurub (EU) ayaa dowr muhiim ah ka ciyaaray kobaca iyo horumarka XHG ee qeybaha baarista.

Sanadka 2024, XHG waxa uu diiradda saaray xoojinta hufnaanta hawlgallada iyada oo loo marayo xiriirada caalamiga ah iyo wada-shaqeynta daneeyeyaasha . XHG ayaa horumar weyn ka sameeyay ujeeddooyinkiisa isaga oo kaashanaya Hay'adaha Hantidhowrista Sare (SAIs), bahwadaagta, iyo hay'adaha horumarinta caalamiga ah. Ka-qeybgalka shirarka iyo goleyaasha caalamiga ah ayaa XHG fursad qiima leh u siiyay in uu helo xalal cusub oo waxtar leh iyo hab-raacyo wanaagsan. Wada-shaqeyntan waxa ay xoojisay sida XHG ay uga go'an tahay kor u qaadista isla-xisaabtanka iyo hufnaanta maareynta kheyraadka ummadda.

Sidoo kale, XHG waxa uu mudnaanta siisay iskaashiga bahwadaagta gudaha dalka, iyada oo la hubinayo xiriir waxtar leh iyo hirgelinta natiijooyinka iyo talooyinka baarista. Xiriirka wada-shaqeyn ee wasaaradaha, waaxyaha, wakaaladaha, warbaahinta, iyo daneeyeyaasha kale ayaa horseeday istiraatiijiyad isku-dhafan oo khuseysa maareynta Maaliyadda Guud, taas oo wax ka tareysa horumarka waara iyo dowladnimada Soomaaliya.

Marka loo eego guulaha la gaaray, XHG waxa uu ku faanayaa waxqabadka iyo xiriirada u dhismay. Dadaallada xiriirada iskaashiga caalamiga ah ayaa muhiim u ahaa in heer fiican laga gaaro hab-raacyada baarista iyo kobaca hay'adeed. Waayo-aragnimada laga dhaxlay iyo iskaashiga la dhisay sanadkan ayaan shaki ku jirin in ay gogol-xaar u noqonayaan horumar joogta ah oo la gaaro sanadaha soo socda, taas oo XHG ka u sahleysa in uu ka cayaaro dowr muhiim ah oo ku aaddan xoojinta dhaqanka hufnaanta iyo iskaashiga ee gudaha Soomaaliya.

## 5.1. Kulamada iyo hawlaha u qabsoomay XHG sanadka 2024

1. Aqoon-is-weydaarsi dib-u-eegis lagu samaynayay Qorshaha Guud ee Baarista Sanadka 2024, Muqdisho, Soomaaliya, 8-10 January 2024.

2. Kulan lala yeeshay Safaaradda Boqortooyada Norway (RNE), Muqdisho, Soomaaliya, 16 January 2024.

3. Kulan Hordhac ah oo la la yeeshay Hay'adda Carabta ee Hay'adaha Hantidhowrista Sare (ARABOSAI), 6 February 2024.

4. Shir sanadeedka Guddiga Hagista Mashruuca Taageerada Bah-wadaagta 2024, oo qabsoomay, 28 February 2024.

5. Kulanka sanadlaha ah ee XHG iyo Bahwadaagta Horumarinta, 6 May 2024.

6. Shirkii 26aad ee UN/INTOSAI oo ku saabsanaa Hirgelinta SDG 13 ee Wax-qabadka Cimilada, Vienna, Austria, 16-18 April 2024.

7. Kulan fogaan arag ah oo looga hadlayay Qorsheynta oo XHG uu la yeeshay XHG-DXDFS, 22 April 2024.

8. Waxaa qabsoomay Kulan Sanadle ah oo ay isugu yimaadeen XHG, hay'adda horumarinta INTOSIA ee loo soo gaabiyo IDI iyo RNE, 25 April 2024.

9. Tababar baraarujin ah oo XHG u qabtay Hay'adaha kala duwan ee dowladda , Muqdisho, Soomaaliya, 29-30 April 2024.

10. Waxaa qabsoomay shirkii 20aad ee XHG iyo Guddiga Maamulka AFROSAI-E ee dib-u-eegista Istiraatiijiga ah ee 2024, Kampala, Uganda, 6-9 May 2024.

11. Xafladda ansixinta heshiiska is af-garadka (MoU) ee XHG iyo Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Sweden (SNAO), Kampala, Uganda, 7 May 2024.

12. Kulan Ku Dhexmaray Hantidhowraha XHG iyo SAI Djibouti, 14 May 2024.

13. Kulan Hordhac ah oo la la yeeshay XHG-Puntland, 16 May 2024.

14. Kulan Farsamo Heer Sare ah ayaa dhexmaray XHG iyo XHG-DXDFS, 2-4 June 2024.

15. Kulanka 1aad ee Guddiga Hagista ee EU SFA TA, 5 June 2024.

16. Kulan Hantidhowraha uu la yeeshay Midowga Yurub (EU), Muqdisho, Somalia, 25 August 2024.

17. Booqasho Xog doon XHG uu ku tagay xafiiska Hay'adda Horumarinta INTOSAI (IDI), Oslo, Norway, 1-5 September 2024.

18. Kulan Hantidhowraha uu la yeeshay Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda ee Baarlamaanka Federaalka, 17 & 22 September 2024.

19. Kulan Ku Dhexmaray XHG iyo XHG-Puntland, 24 September 2024.

20. Kulan heerkiisu-sarreeyo oo ku saabsan Qorshaha Baarista Bulshada Bariga Afrika, Mwanza, Tanzania, 17-24 October 2024.

21. Kulan lix-biloodba-mar ah oo XHG la yeeshay Bahwadaagta Horumarinta, 23 Oktoobar 2024.

22. Kulan XHG uu la yeeshay ururka AFROSAI-E, 4 November 2024.
23. Kulan ay isugu yimaadeen XHG iyo Bankiga Adduunka, Muqdisho, Soomaaliya, 7 November 7, 2024.
24. Shirweynaha 2aad ee Sanadlaha ah ee Hey'adda Xisaabiyayaasha Soomaaliyeed (SICPA), Muqdisho, Soomaaliya, 2-3 December 2024.

## 5.2. Mashruuca Taageerada XHG ee hay'adaha dhiggeena ah

IDI iyo AFROSAI-E ayaa fuliyay Mashruuca Taageerada Iskaashi ee XHG (PSP) oo ah hindise wadajir ah oo ay maalgelisay Safaaradda Boqortooyada Norway. Tan iyo sanadkii 2015, XHG ayaa iskaashi istiraatiiji ah la lahaa hay'adahan si loo xoojiyo awooddda hay'adeed iyo midda waxqabad ee xafiiska. Markii la qaatay Qorshaha Istiraatiijiga ah ee XHG 2023-2027; waxaa la caddeeyay in XHG iyo IDI, AFROSAI-E ay sii joogteynayaan iskaashigooda iyaga oo fulinaya Mashruuca Taageerida Iskaashi ee XHG ee 2023-2024.

Ujeedka ugu weyn ee mashruucan waa "in XHG uu awoodi karo in uu gaaro natiijooyinka istiraatiijiga ah ee uu qorsheystay kuwaas oo la xiriira baarisyada muhiimka ah iyo xiriirka daneeyeyaasha  ee 2023-2024." Natiijooyinka ugu muhiimsan waxaa ka mid ah in la fuliyo baarista sanadlaha ah ee maaliyadda, u-hoggaansanaanta sharciga, baarista fatashka (forensic audits), iyo in natiijada baarista loo gudbiyo daneeyeyaasha  muhiimka ah. Hindisahan ayaa la filayaa in uu gacan ka geysto hanashada yoolasha istiraatiijiga ah ee XHG, gaar ahaan marka la xoojiyo dowrka Baarlamaanka ee daba-galka talooyinkii ku xusnaa baarista, waxa ay ugu dambeyn horseedaysaa in Hay'adaha fulinta la yimaadaan hirgelin dhab ah.

Waxaa intaas dheer, iskaashigan ayaa la cusbooneysiinayaa iyada oo lagu kordhinayomuddo sanad ah 2025-2027, si ay u sii socoto taageerada aan u heysano fulinta Qorshaha Istiraatiijiga ah ee 2023-2027. Marxaladda xigta waxa ay hortabinsiinaysaa dhammeystirka baarista sanadlaha ah ee Maaliyadda iyo U-hoggaansanaanta Sharciga, Fatashka iyo in warbixinta baarista loo gudbiyo daneeyeyaasha  muhiimka ah. Dadaalladan ayaa looga gol-leeyahay in lagu horumariyo natiijooyinka istiraatiijiga ah ee XHG, gaar ahaan in la xoojiyo dowrka Baarlamaanka ee kor-joogteynta iyo dabagalka iyo in talooyinka baarista ay dhaliyaan isbeddel taban oo hirgala.

## 5.3. Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Sweden

Xafiiska Hantidhowrka Qaranka Sweden (Swedish NAO) iyo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (XHG) waxa ay iskaashi rasmi ah oo ku qotama heshiis isfaham (MoU) wada saxiixdeen bishii May 2024. Heshiiskan oo dhaqangal ah illaa Juun 30, 2029, waxa uu billow u yahay iskaashiga laba gee-soodka ah ee labada hay'adood. Ujeedka ugu weyn ee iskaashigan waa in la xoojiyo awoodda XHG si uu u noqdo Hay'ad Hantidhowr Sare oo madax-bannaan laguna kalsoonaan karo. Si loo dhaqangeliyo hufnaanta iyo isla-xisaabtanka maamulka kheyraadka dalka, waxaa hindisahan uu xoogga saarayaa in hawlaha shaqo ee XHG lagu jaangooyo hab-raacyada caalamiga ah. Meelaha hortabinta leh waxaa ka mid ah in la xoojiyo awoodaha hawlgalka baarista iyo in la helo kab gaar ah oo labada dhinac heshiis ku yihiin.

Iskaashigan waxa uu ku qotamaa aragti fog oo taabaneysa horumarka. Waxaa qorsheysan wadahadallo lagu cusbooneysiinayo heshiiskan (MoU) iyo qorshaha mashruuca in dib loo billaabo hal sano ka hor dhammaad heshiiska hadda jira, taas oo ku xiran ogolaanshaha labada dhinac ee joogteynta wada-shaqeynta.

## 5.4. Bangiga Adduunka

XHG ayaa sanadkii 2023 ka helay Bankiga Adduunka taageero farsamo oo bartil-maameedkeedu yahay Waaxda Baarista Waxqabadka. Bankiga Adduunka oo xoo-jinaya awoodda xafiiska ayaa soo diray la-taliye sare oo caawiya Waaxda Baaris-ta Waxqabadka, tayeynta xirfadda baareyaasha waaxda, iyo dhammeystirka laba baaris tijaabo ah oo lagu sameynayay mashaariic uu maalgeliyay Bankiga Adduun-ka. XHG waxa uu Bankiga Adduunka ka filanayaa in uu ka helo taageero maaliya-deed iyo mid farsamo oo joogto ah, kuna timaada Mashruuca Horumarinta Maamu-lka Kheyraadka guud ee Soomaaliya (SERP).

## 5.5. MIDOWGA YURUB (EU)

### TAAGEERADA FARSAMO EE ISLA-XISAABTANKA MAALIYADDA (EU SFA TA)

Mashruuca Midowga Yurub (EU) ee Taageerada Farsamo ee Isla-xisaabtanka Maa-laiyadda ee Soomaaliya (EU SFA TA) waa hindise ballaaran, wakhtigiisuna dheer ya-hay oo loogu talagalay in lagu xoojiyo awoodaha hay'adeed si loo horumariyo wax-tarka waaxyaha baarista,loona hagaajiyo tayada baarista guud ahaan Soomaaliya. Barnaamijkan dhinacyo badan oo ka mid ah waxa uu taageeraa noocyo walba oo baaris ah oo ay ku jiraan baarista u hoggaansanaanta sharciga, baarista maali-yadda, iyo baarista gaarka ah, isaga oo sidoo kale siinaya taageero farsamo oo gaar ah Xafiisyada Hantidhowrka Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Fed-eraalka (XHG-DXDFS).

Qorshaha Istiraatiijiga ah ee XHG waxa uu hortabin gaar ah siinayaa hirgelinta Yool-ka 7aad, kaas oo looga gol-leeyahya in aasaas adag loo dhigo isla-xisaabtan maali-yadeed oo wax-ku-ool ah.

# 6. QOONDADA MIISAANIYADDA

Baarlamaanka Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) waxa uu ansixiyay miisaaniyadda la qoondeeyay, taas oo saldhig u noqotay diyaarinta miisaaniyadda XHG ee 2023. Qaab-dhismeedka miisaaniyadda XHG waxa uu ku meeleeyay dhammaan dakhliga iyo kharashaadka madaxyo iyo madax-xigeenno u gaar ah, si waafaqsan qaab-dhismeedka Miisaaniyadda Qaranka. XHG waxa uu si joogto ah u cusbooneysiisay nidaamyada maareynta maaliyadda ee muhiimka ah si ay u fududeyso soo gudbinta warbixinno heerar kala duwan leh, laga bilaabo macaamil kasta oo shakhsi ah illaa waxqabadka guud ee XHG.

Sanad maaliyadeedka dhammaaday Decembar 31, 2024, XHG waxa uu wada isticamaalay miisaaniyaddii loo qoondeeyay, Tani oo muujineysa heerka aadka u sarreeya ee isticmaalka miisaaniyadda oo ku dhow 100%..

# Nidaamka Qaabdhismeedka Taageerada | 2023-2027

## Yoolasha 2023-2027




## Waaxyaha hogaaminaayo

- Baarista iyo Maareynta Tayada
- Qorsheynta iyo Waxqabadka
- Taageeradda Istaraatiijiyadda
- Maamulka Shaqaalaha iyo horumarinta
- Isgaarsiinta iyo xiriirka teknolijiyada, iyo Maamulka maaliyada
- Diiwaangelinta iyo xusuus dhowrka
- Xiriirka dowlad goboleedyadda

## Illaha Dhaqaalaha

**Dowladda Federaalka Soomaaliya**

Shaqaalaha iyo taageeradda maaliyadeed
- Xuquuda shaqaalaha
- Kharashaadka Xafiiska

**Bankiga Aduunka**

Lataliyayaasha Wakhtiga Fog
- Baarista Waxqabadka
- Howlaha Maamulka

(Maamul Goboleedyada)

Taageeradda Maaliyadeed
- Kaabayaasha Isgaarsiinta iyo Xiriirka Teknolijiyada
- Horumarinta Mihnadeed
- Shirarka iyo Tababarada
- Taageeradda Dowlad Goboleedyada
- Gawaaridda Xafiiska
- Dhaqan Gelinta Sharciga Hantidhowrka

**Midowga Yurub**

Lataliyayaalka Wakhtiga Fog
- Baarista Maaliyadda
- Baarista u Hogaansanaanta Sharciga
- Baarista gaarka ah
- FMS-OAGs

**Boqortooyadda Safaaradda Norway**

IDI / AFROSAI-E

Taageero farsamo iyo mida maaliyadeed oo ku daaban Ujeedooyinka dhamaan yoolasha istaraatiijiyada muhiimka ah oo aay taabogeliyaan IDI & AFROSAI-E iyo Shaqsiyaad kale ee hay'adaha Hantidhawrista caalamiga ah

| | |
|---|---|
| Hanaanka isku Dabaridka Shaqada | - Taageerada yoolasha istaraatiijiyadeed ee XHG iyo Qorsho howleedyadda |
| Hab Warbixineed | - Shirarka lix bilood laha ah ee dhamaan Bahwadaag<br>- Warbixinta Waxqabadka XHGS |

**XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD**
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Muqdisho, Soomaaliya

www.oag.gov.so | oag@oag.gov.so